Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

# HALGANKII UMMADDA
# IYO
# HALYEY
# DR.IBRAAHIM MAYGAAG SAMATER



**Mareegta Farshaxan**
**April 6, 2011**
**Sannad-Guuradii 30aad**
**ee aasaaskii**
**Ururka SNM**



## Halgankii Ummada Somaliland

Ummada reer Soomaaliland halgan aad u dheer ayey u soo galeen xornimadoodii lixdankii si fudud loo boqno gooyey. Markii iskudar ku sheegii dhacay waxaa markaa hogaanka dhinicii gobolada woqooyi gacanta ku dhigay dadkii aqoonta lahaa. Qoyska reer Fure xilligan iyo xilligii gumaysigaba si laxaad leh ayey uga qayb qaateen dhinacyada waxbarashada.Waxaa tilmaan muuqata lahaa Yuusuf Ismaaciil Samater (Gaandi)-IHUN-oo waxbarashada dhinaca Burco gacanta ku hayey laguna suntana inuu ahaa aabahaha labaad ee waxbarashada Somaliland.Waxaa la wadaaga magacaa Yuusuf Xaaji Aadan-IHUN- oo isguna joogay Hargeysa. Waxaa hogaamiye waxbarsheed ahaa (Regional Educational Officer-REO-) Cumar Maygaag Samater. Waxaa Kormeer waxbarasheed noqday Xasan Maygaag Samater.Waxaa kooxihii ugu horeeyey ee Suudaan waxbarasho u taga ku jiray Cali Maygaag Samater, ahaana qoraa qalinkiisu ku xardhanaan jiray wargeyskii Qarni Ifriiqiya.Waxaa kaloo ahaa khasnajigii ururkii SNL Aadan Cumar Fure,markii danbena noqday "Mayor"-kii ugu horeeyey ee Ingiriiska talada kala wareegay.

Haddaan sii wadno inaan ka sheekayno reer Fure iyo siday uga qayb qaateen dhinacyada bulshada,dhaqaale,siyaasadeed,iwm ka bixi mayno.Hase yeeshee qoraalo danbe ayeynu insha Allah kaga warami doonaa.

## Halgankii SNM:

Halgankii SNM ummadu umay kala hadhin,haddana la kala badsey.Waxaa runtii aad loo dareemaa inuu 1986kii uu Ibraahin Maygaag inankiisa kaliya ee Raage ka kaxeeyey dibada,geeyeyna xarumahii dagaalka. Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani oo arintaa ka waramaya ayaa ku tilmaamay inay aheyd arinta uu Ibraahim Maygaag kaga duwanaa aqoonyahanadii iyo saraakiishii ka qayb qaaatey halgankaa,isagoo sii wadana wuxuu yidhi:

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

"Ibraahim Maygaag waxaa u cuntami wayday inuu jiida hore ee dagaalka la joogo dhalinyaro badan,inankiisuna uu Maraykanka wax ka barto".
Arintani waxay si cad uga muuqatey qoyska Ilma Fure iyo tafiirtooda oo dagaalkaa aad u rumaysnaa,ogolaana in loo sadqeeyo nafta,caruurta, aqoonta, maalka, iyo inta bani'aadan hiigsadaba.

Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa dhinaca qawaaniinta ee ururkii SNM waxaa qaabilsanaa Cali Ismaaciil Samater Fure.Gurigii Jiddah layskugu iman jiray markii lagu jiray aasaaskii SNM waxaa lahaa Cumar Maygaag Samatar Fure,oo 1985kiina u soo wareegay wadanka Ingiriiska kana hawlgalay xafiiskii SNM-ta ee London.Intii aan ururkii SNM lagu dhawaaqin wakiilka xaga dhaqaalaha ee isku xidhkii saraakiisha, ganacsatada, aqoonyahanada, iwm ee Xamar waxaa u qaabilsanaa Jaamac Aw Cismaan Ismaaciil Samater Fure, markii danbena maxkamada lala soo taagey Ismaaciil Cali Abokor iyo Cumar Carte Qaalib.Halka uu xidhiidhka Hargeysa u qaabilsanaa Cali Aw Cismaan Ismaaciil Fure.

Xilli ku beegnayd 1974[kii] xubnihii firfircoonaa ee hagayey dhaqdhaqaaqii qarsoonaa gundhigana u noqday aasaaskii SNM iyo xorayntii Soomaaliland waxaa ka mid ahaa Kornayl Maxamed Cilmi Samater Fure oo taliye sare ka ahaa ciidankii Cirka dalkii Soomaaliya la isku odhan jiray,kaalin weyna ka soo qaatey dagaaladii SNM ilaa uu nabar halis ahi ka soo gaadhey. Kornayl Maxamed Cilmi Samater Fure ilaa iminka wuxuu ka mid yahay dadka madaxbanaanida Soomaaliland iyo horumarkeeda u taagan.

Boqol iyo kontonkii (150) ugu horeeyey ee ciidamada SNM loogu tababaro magaalada Baabuli waxaa ka mid ahaa Rashiid Cumar Samater Fure (Rashiid Case),Axmed Cilmi Samater.Waxaa kaloo ururkii SNM ka mid ahaa Axmed Yuusuf Cumar Fure iyo Axmed Aadan Cumar Fure.Xubnihii ugu firfircoonaa halgankii ummada dhinaca Jabuuti waxaa ka mid ahaa Sh. Xuseen Maygaag Samater Fure oo gurigiisu ahaa saldhig hawlaha ururka SNM lagu fuliyo.Halgankaa reer Fure umay kala hadhin awoow,aabo iyo inan ee jiidaha hore ee dagaalka ayey iska xaadiriyeen.

## Reerka Ilma Fure:



Ibraahin Maygaag Samater wuxuu ka soo jeedaa qoys aad u balaadhan.Qoyskan taariikhda ummada Soomaliland wuxuu ka galay kaalin weyn.Dhinaca waxbarashada ayaa aad loogu xasuustaa, iyagoo dhinacyada kale ee noloshana kaalin muuqata ay ka qayb qaateen.

Fure wuxuu dhalay shan caruura oo kala ahaa Aw Nuur, Ducaale,Cumar,Ismaaciil iyo Samater. Aabo Samater Fure iyo hooyo Cawrala Cabdi waxay dhaleen caruur ay ka mid ahaayeen Ismaaciil, Maygaag, Saleebaan(Cadan ku dhintay) iyo Cilmi.Hase yeeshee hooyo Cawrala Cabdi waxaa haleeshay geeri,waxaana Samater Fure xigsiisin ahaan u guursadey hooyo Faadumo Cabdi oo u dhashay Muuse.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Dhamaan caruurta ilma Samater Fure waxay u hayaameen dhinacaa Cadan.Waxaana nolol ahaan ku soo noqon ee halkaa ku dhintay Saleebaan iyo Muuse oo isagu ahaa ilaa 15 jir markuu dhintay.Waxaa 1901[kii] mastaafuris ahaan Cadan looga soo saarey Cilmi.Waxaase waxbarasho ka soo hantay intay joogeen halkaa Maygaag iyo Ismaaciil.

Ismaaciil wuxuu dhalay Yuusuf, Cabdi, Aw Cismaan,Maxamed, Maxamuud, Axmed, Cumar, iyo Cali ( Cali madoobe). Maxamed wuxuu noqday agaasimihi guud ee dawladii ugu horeysay ee wadankii Soomaliya.Maxamuud wuxuu wax ku soo bartay wadanka Maraykanka.Markii uu Maxamuud soo noqday 1971[kii] isagoon wali shaqo bilaabin ayuu geeriyooday .Yuusuf wuxuu qayb laxaad leh ka qaatey waxbarashada Soomaaliyeed gaar ahaan Somaliland bilawgii.Caruurta uu Cilmi dhalay waxaa ka mid ah Maxamed, Cabdi,iwm.Mujaahid Maxamed Cilmi Galaan wuxuu ka mid ahaa hormoodkii sida qarsoon gudaha dalkii Soomaliya uga wadey dhismihii ururkii SNM,kaalin mugleha ka qaatey aasaaskii SNM ee gudaha sida qarsoon uga socday.Wuxuu Maxamed ahaa kornayl ka tirsan ciidamada cirka,waxaanu ahaa taliye ku xigeenka ciidamada Cirka ee woqooyiga wadankii Soomaaliya la isku odhan jiray.Waxaa kaloo tafiirta Cilmi ka mid Muuse Cabdi Cilmi oo ah gudoomiyaha Jaamicada Hargeysa, kana mid ahaa abwaanadii sameeyey ruwaayadii Aqoon iyo Afgarad gu'gii 1972.

Maygaag wuxuu ku dhashay Hargeysa ,kuna koray isla magaaladaa.Maygaag isagoo koray ah ayuu u anbabaxey dhinacaa Cadan oo markaa Maxmiyad Ingiriisa aheyd. Maygaag waxaa u suurtogashey inuu barto dhawr af(luqadood) intuu Cadan ku sugnaa sida Carabiga, Ingiriiska iyo Hindiga. Magaalada Cadan xilligaa waxaa shaqaale ka ahaa Hindi farabadan oo hawlaha gumaysigii Ingiriiska fulin jiray,dhexgalkii uu dhexgalay kuwan baana u suurtogalisay inuu barto Af-Hindiga. Xilli ku beegan dagaalkii labaad horaantii ayuu Maygaag yimid magaalada Berbera.

Maygaag wuxuu shaqo af-celiye ah ka bilaabay magaalada Berbera.Maygaag wuxuu arkay baahida loo qabo waxbarasho.Maygaag waxyaalaha aad loogu tilmaamo waxaa ka mid ahaa inuu jeclaa in qofku waxbarto,aadna wuu ugu heelana inuu ka qayb qaato waxbarista bulshada. Maygaag aad buu u jeclaa inuu qofku waxbarto kuna dhiirigalin jiray dadka.Waxaan tusaale u soo qaadan karnaa mar uu la kulmay Axmed Maxamed Cawlo oo u kicitimayey dhinacaa dalka Kenya shaqo ahaan,kuna socday qaraabadii oo halkaa deganeyd. Maygaag wuxuu Axmed Maxamed Cawlo u sheegay inaanu shaqo waqtiga oo dhan siin ee uu waxbarashana soo barto. Axmed Maxamed Cawlo taladaa muu dhayalsan,waxaanu soo bartay karaaninimo, ilaa uu markii danbe ka gaadhey karaanimo sare (Chief Clerk).Inkastoo Axmed Maxamed Cawlo uu markii xoriyada la qaatey ka mid ahaa dadkii aad uga soo horjeeday in koonfur lagu darsamo,uuna 1962 shaqadii kaga tagey hawlgab ahaan(pension).

Markuu Maygaag halkaa Berbera muddo ku sugnaa ayuu arkay sida dhalintu ugu haraadan yihiin waxbarasho,waxaanu magaalada Berbera ka furay dugsi lagu barto afka Carabiga. Muddo markuu socday dugsigii ayuu xidhiidh iskaashi la sameeyey maamulkii Ingiriiska una sheegay sida ay u haboonaan laheyd in lagu kordhiyo barashada Af-Ingiriisiga. Maamulkii Ingiriisku wuxuu ogolaadey inuu mushaharkana bixiyo,macalin ahaana dugsigaa ugu soo qoray Maxamuud Axmed Cali.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Halkaa waxaa ka unkamay dugsigii ugu horeeyey ee waxbarasho, ka dib markii Maxamuud Axmed Cali balaadhiyey. Madarasadaasi waxay unug u noqotay inay dhasho iskuulkii ugu horeeyey ee dalka laga dhiso,kana ambaqaadey Berbera oo uu hogaanka u qabtay markii danbe Maxamuud Axmed Cali,uuna aasaasay Maygaag Samater.

Qandaraasyada dawladii Ingiriiska waxaa had iyo jeer qaadan jiray shirkado Hindi ah.Waxaa markaa arintaa inuu ka qayb qaato u hawlgalay Aadan Cumar Fure oo markaa isagu wax isbaray.Maygaagna wuxuu goostay inuu shaqadii Af-celiyaha aheyd hakiyo.Waxaanu Maygaag shirkad la furtay wiil ay ilmaadeer ahaayeen oo la odhan jiray Aadan Cumar Fure. Waxaanay Maygaag iyo Aadan shirkadii u bixiyeen "Shirkada Samater".Shirkadani waxay qaabilsanayd qaadashada qandaraasyada wadooyinka, Ciidanka Ingiriiska Yemen ka fadhiyey hilib u gayntiisa, Raashinka, Agabka dhalintii Boys Scouts,iyo fulinta hawlihii boosta.

Maygaag wuxuu u soo balaadhsadey dhinaca Hargeysa, kana furay Samaters' bookshop 1951[kii]. Waxaa kaloo markan uu hormood ka noqday ururkii SNL.Waxaa si fiican u kaabaqaadey dukaankaa buugaagta. Waxaa markaa lagu daray in la furo madbacadii Qarni Ifriiqiya. Waxay cod u aheyd ururkii SNL. Xilli ku beegnayd 1963[kii] Wuxuu Maygaag bilaabay Basaskii ugu horeeyey ee u kala goosha dhamaan dalka Soomaliland.

Maygaag wuxuu dhalay 13 wiil iyo 13 Gabdhood, marka la tiriyo inta hanoqaadey ee wiilasha ah.Caruurta Maygaag waxaa ka mid ahaa Yuusuf, Abaadir, Ismaaciil, Cabdilaahi, Cali, Xasan, Cumar, Faarax , Khaliif, Ibraahin, Xuseen, Siciid, Jaamac, Maryan, Faadumo, Cadar,iwm. Waxaa Maygaag lagula kaftami jiray inuu marka danbe waayo magac uu ku baadisooco caruurtiisa tiro badni awgeed.Illaahay wuxuu Maygaag ugu deeqay caruur tiro badan.Waxaanu sidaa ku noqday ka ugu tafiir badan walaaladii ilma Samater Fure. Caruurta uu Maygaag dhalay waxaa ka mid ah Mujaahid Ibraahin Maygaag Samater oo ay xaga hooyana ka walaalo yihiin Cali iyo Cabdilaahi. Caruurta Maygaag taariikh lama ilaawaana ayey ku leeyihiin bulshada Soomalida,gaar ahaan bulshada reer Somaliland.Bal aynu in yar isdul taagno wax ka sheega qaar ka mid ah caruurta Maygaag:

1. Yuusuf Meygaag Samatar
    - Wuxu xubin ka ahaa guddidii af Soomaaliga
    - Wuxu qoray buugga la yidhaa: Madhaafaanka murtida
    - Raadyaw Hargeysa wuxu ka sii deyn jirey qorme uu af iyo dhaqanka kaga hadlijirey
2. Xasan Meygaag Samatar
    - Wuxu madax ka ahaa wasaaradda waxbarashada Soomaalilaand.
    - Waxa loo beddelay wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
    - Wuxu Soomaalida u fadhiyijirey ururka dawladaha Islaamku leeyihiin ee la yidhaa Raabidatul-Caalam Al-Islaami. Waxaanu ka mid noqday la taliyayaasha guddoomiyihii Ururka.
    - Markii uu shaqada ka fadhiistay wuxu madax ka noqday ururka fidinta Diinta Islaamka ee ay dawladda Sacuudigu maal gelisay fadhigiisuna ahaa dalka Swedan. Hadda wuxu joogaa Hargeysa, Soomaalilaand.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

3. Cumar Meygaag Samatar:
   - Wuxu ka mid ahaa madaxdii wasaaradda waxbarashada. Wuxuna ku xigeen u ahaa walaalkii Xasan Meygaag Samatar. Waxa loo beddelay oo agaasime looga dhigay wakaaladdii madbacadda qaranka ee Muqdisho.
   - Wuxu ka mid ahaa 73$^{kii}$ agaasime ee ay dawladdii Siyaad Barre shaqada ka fadhiisisay 1975$^{kii}$. Waxanu u dhoofay dalka Sucuudiga.
   - Wuxu ka mid ahaa aasaasayaashii ururka SNM. Gurigiisuna wuxu ahaa xarunta iyo bar kulanka abaabulayaashi ururka SNM. Wuxu u wareegey dalka Ingiriiska.Waxaanu halkaa kaga mid noqday shaqaalihii Xafiiskii SNM ee London. Halkaasi ayuuna ku geeriyooday.

4. Cali Meygaag Samatar:
   - Wuxuu wax ku soo bartay Suudaan. Wuxu xubin firfircoon ka ahaa ururkii gobonimo doonta Soomaalilaand ee SNL. Waxay isaga iyo nin la odhan jirey Cumar dheere wada qorijireen warsidaha la odhan jirey Qarnul-Ifriiqiya ee ku hadlijirey afka Ururka SNL.
   - Kolkii calanka la qaatay wuxu ka hawl galay saafaaraddii Soomaalida ee ku tiil Daara Salaam.
   - Wuxu jirey dadkii ay maammulkii Askartu dib u soo celiyeen ee loo diray Xalane.
   - Shaqadii wuu ka tegey,waxaanu u dhoofay dalka Sucuudi Arabiya. Halkaasi oo uu ka shaqaysan jirey. Ugu dambayntiina uu ku geeriyoodey.

5. Siciid Meygaag Samatar:
   - Yaraantiisii wuxu ka tirsanaan jirey ururkii loo yiqiin 'Boy scout'.
   - Wuxu noqday guddoomiyaha ururkii ardayda ee Jaamacaddii Lafoole.
   - Markuu ka qalinjebiyey Lafoole wuxu u duulay dalka Sacuudiga.
   - 1980$^{kii}$ buu Maraykan u dhoofay si uu waxbarashadiisa u sii wato. Wuxu ka qalinjebiyey jaamacadda la yidhaa UCLA.
   - Wuxu sameeyey ururkii SOPRI oo uu guddoomiyena ka ahaa.
   - Wuxuu qayb laxaad leh ka qaatey inuu xisbiyada mucaaridka ee Soomaaliland u furo gogol ay si cilmiyeysan iskugu soo horfadhiistaan,kuna daweeyaan isafgaranwaa u dhaxeeyey.

6. Ismaaciil Meygaag samatar
   Wuxu madax ka noqday wasaaraddii boosaha ee Hargeysa

7. Khaliif Meygaag Samatar
   kastammada ayuu ka shaqayn jirey.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

# WAA KUMA IBRAAHIN MAYGAAG SAMATER:

Waa lama huraan geeridiyo  hoyga aakhiro e'
Hayeeshee huqbay leedihiyo  hibasho gooniya e'
Hiirtaanyaday kugu dishaa  hadhiyo laylkiiye
Maygaag halyey buu ahaa  loo harad qabaye
Alaylahe haldoor baa ka baxay   hanadadeeniiye
Hakad baa Rashiidaw ku yimi  horumarkeeniiye
Suuganta hodanka ah murtida  heli ogaanteeda
Hawraar odhaah iyo farshaxan  hoga tusaalaynta
Kala haadintiisiyo naxwaha kala hufnaantiisa
Garashada hugeediyo sarbeeb hadala raac raaca
Hilaad iyo aqoon iyo waxgarad  hawlkar iyo daacad
Hufnaan iyo mudnaan iyo hab dhaqan  geesi lagu hiisho
Iyo hoga tausaalaha gartiyo guurti ma huraan ah
Geed hadh ah oo la hadhsadoo  hiifta lagu reebo
Haday liicdo oo aad dhibiyo   halis ka yaabayso
Ku hagoogashada dhiiladiyo  hoy isugu gaynta
Hal karaanka  isu soo hagiyo  nabad heshiisiinta
Halgan run ah hayaan meelmariyo  haybad lagu guuro
Hindisaha timaan iyo odoros  himilo joog dheer leh
Hadal deeq leh  isus oo hilaw  dhiirri hana qaada
Baaq hodan hirar kuu baxoo lagu hayaamaayo
Hogol curatay harahoo biyo leh  haqab la'aantooda
Kooshinaw hogaan buu ahaa  heer u joogaba e'
Inkastoo hediisii gashoon  laga horjoogaynin
Alaylahe halbawlaa badh go'ay loo hamuun qabye
Allaw hoyga aakhiro janada  hagar la'aan seex
Inta NABIGA (SCW) meel la hadhsatee  Cali hareer jiifi
Eebow halaagiyo dhibtiyo  hooga ka ilaali
Eebow adaa hodana oo  deeqda noo hura e'
Eebow haleelada janada   hoyga u balaadhi

Erayadii Cabdiraxmaan Cawl "Baqdaadi"



Maygaag Samater  oo shaqaale afceliye u ahaa dawladii Ingiriiska ayaa safarkiisa shaqo aad u badnaa. Maygaag oo ay u dhaxeen dhawr dumar ahi ayaa safaro ku tagi jiray  degaano badan isagoo hawshiisii afcelinta aheyd gudanaya ama xoolihiisa miyi ka soo wardoonaya. Sida taariikhdu sugayso caruurta Maygaag in badan ayaa dhalatey iyadoo safar d xoolaha loogu raadinayo degaan daaq leh. Sida Xasan Maygaag oo Xagal ku dhashay,halkuu Cumar Maygaagna kaga dhashay Garabis. Magaalada Herer waxay ka mid aheyd magaalooyinka ay shaqadiisu u badneyd.Wuxuu Maygaag magaalada Herer ku guursadey

hooyo Cibaado Cigaal Geelle(IHUN).Waxaanay halkaa ugu dhashay Cali,Cabdilaahi iyo Shamis.

Bilawgii dagaalkii labaad ee aduunka waxaa xoog ku qabsadey degaankaa dawladii Talyaaniga oo gacanta sare kaga yeelatey dawladii Ingiriiska.Dadkii u shaqeynayey dawladii Ingiriisku waxay u kala jabeen laba qaybood.Qayb Ingiriiska u raacdey dhinaca koonfurta Soomaliya(Italian Somalia) iyo qayb degaanada Soomalidu degto ee agagaarka Awaare iyo Xarshin u soo digorogatey.Qaybta hore waxaa ka mid ahaa Ismaaciil Faarax oo markii danbe ku guursadey magaalada Baladweyn hooyo Sidciyo Faarax ayna u dhashay Sh.Abuubaker Ismaaciil (Sh.Jabha).Halka uu Maygaag ka mid noqday kooxdan danbe. Waxaanay reer Maygaag soo degeen magaalada Qollad oo Awaare dhinaca woqooyi galbeed kaga toosan.Xilli ku beegnayd 1941kii ayuu Ibraahin Maygaag ku dhashay magaalada Qollad. Ibraahin Maygaag oo caruurta dhinaca hooyadii ugu yaraa ayaa hooyadii dhimatey isagoo saddex gu' jira. Aragti kale waxay sugaysaa inuu reerku ku jiray safar daaq raadis,ayna halkaa magaalada Qollad hooyo Cibaado umushu ku qabatey.

Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale oo ka waramaya siduu Ibraahim Maygaag ugu suurtogashey inuu Hargeysa ka bilaabo waxbarashadiisii ayaa yidhi: "Ibraahin Meygaag isaga oo yar oo miyi jooga ayuu ku joogsaday awr qoodh ahaa oo ay lahaayeen lana odhan jiray Suqulle (Sugulle). Waxa la ii sheegay in Meygaag Samatar geelaa ka soo iibsaday Ceeri-gaabo oo uu soo kaxeeyay Cumar Meygaag Samatar. Waxa intaa la ii raaciyay in geelaasi ka mid ahaa geelii Ismiidh (Smith) ka soo celiyay Baandadii Majeerteenka. Nabarkii ayaa Hargeysa loo keenay si loogu daweeyo, ka dibna aabbihii Meygaag Samatar ayaa yidhi: ―Dib miyigii loogu celin mayo e' halkan ayaan tacliinta kaga darayaa".

Markii uu yimid magaalada Hargeysa xilli ku beenayd 1950kii ayuu bilaabay Dugsiga Quraanka. Waxaa markaa Ibraahin u suurtogashey inuu fasalka koowaad ee dugsiga laga boodsiiyo aqoontiisa awgeed,kana bilaabay fasalka labaad dugsiga Fisher Elementary School(Dugsiga hoose dhexe ee Sheekh Bashiir iminka)kuna jiray 1951-1953kii. Macalimiinta xilligaa waxaa ka mid ahaa Maxamed Jaamac badmaax, Yuusuf Cali Sh.Maxamed, Yuusuf Ismaaciil Samater-Gaandi,Sh. Cali Xaaji Ibraahin, Muuse Rabiile Good, Xasan Maygaag Samater,Yuusuf X. Aadan, Maxamuud Axmed Cali. Sidoo kale waxaa hogaanka waxbarashada dalka Soomaliland loo tiriyaa oo qayb laxaad leh ka soo qaatey Maxamuud Axmed Cali , Yuusuf Ismaaciil Samater iyo Yuusuf X. Aadan, Waxaanu Ibraahin Maygaag dugsiga dhexe ka galay dugsiga Camuud ee ku yaala magaalada Boorama kuna jiray 1953-1957kii.Isla gu'gaa 1957kii ayuu ka bilaabay dugsiga sare isla Dugsiga Camuud.Hase yeeshee 1959kii ayaa hogaankii waxbarasho ee Ingiriisku go,aansadey inuu dugsiga sare u wareejiyo Sheekh. Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid noqday ardeydii ugu horeysay ee loo wareejiyo Sheekh,waxaanu halkaa ku dhameytay labadii sanno ee ugu danbeysay. Ibraahin Maygaag dugsiga Sheekh wuxuu ku dhameystay waxbarashadiisii dugsiga sare gu'gii 1961kii.

Socdaalkaa waxbarasho ee ilaa heer dugsi dhexe ilaa tagistii dalka Maraykanka waxay soo wada galeen ardey badan oo uu ka mid ahaa Maxamuud Cabdi Dacar.Maxamuud Cabdi Dacar iminka waa daljiraha wadanka Somaliland u fadhiya magaalada Brusels ee laga

hogaamiyo  midawga Yurub.Maxamuud ayaa si faahfaahsan uga waramey safarkaa waxbarasho yidhina: "adeer waxbarashada  dalkeenu aad bey u heersareysay,mudnaan dheeraad ahna way laheyd waxaana runtii qayb weyn ka qaatey aqoonyahano badan oo u dhashey dalkeena aaney hormood u ahaayeen Maxamuud Axmed Cali,Yuusuf Ismaaciil Samater-Gaandi- iyo Yuusuf X. Aadan.Dhinaca dugsiga sare waxaa runtii loo tiriyaa RR Darlington (gacmodheere) oo madaxda dalkeena Somaliland inta badan  wax barey, gaadhsiiyeyna waxbarashada dalkeenu inay mudnaanta koowaad ka hesho dalalkii barwaaqo sooranka dhamaantood".

Madaxweynaha Somaliland ee iminka mudane Axmed Maxamed Siilaayo ayaa qoraal tacsiyeed oo kaga warameyey  RR Darlington ku sheegay "R.R.Darlington will always be venerated and remembered, not only as the greatest British educationist in Somaliland, but as a man who dedicated his entire life to our country and its cause. Please convey my condolences to his family"

Waxaa xilligaa ardeydu heli jireen deeq waxbarasho oo u badneyd jaamicadaha wadanka Ingiriiska. Xilligan wadamada Afrika ayaa  qaarkood ka hoos baxey heeryadii gumaysiga. Dalalka Afrika waxaa dan weyni ka gashey dalalkii waaweynaa xilligaa  sida Maraykanka. Waxaanu  deeqdii waxbaraso ee ugu horeysay ugu deeqay ardeydii dugsiga Sheekh oo ahaa hormoodkii waxbarasho ee dalalkii barwaaqo Sooranka(Commom Wealth) sida Australia, New Zealand, Kenya, Tansaniya,iwm.Gu'gii 1961ayuu Ibraahim Maygaag ka mid noqday sagaalkii ardey eek u guulaystay deeqdaa waxbarasho ee Maraykanku fidiyey.

Waxay kooxdan ardeyda  ee sagaalka ahi u qaybsanaayeen laba kooxood. Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid noqday kooxdii koowaad.Waxaa kaloo ardeydaa ka mid ahaa Maxamud Cabdi Dacar oo Burussels iminka daljire  uga ah wadanka Somaliland, Mahdi Ibraahim, Maxamed Towfiiq,Cabdilaahi Gaaxnuug iyo Saleebaan Siciid (IHUN).Kooxda labaad ee ardeydaa ka mid ahina waxay ahaayeen Cumar Maxamed, Jaamac Rabiile Good, Jaamac Cabdi, iyo Saleebaam Siciid.Waxaana kooxdan danbe la dajiyey gobolka Konectikat oo saldhig u ah Jaamicada Yale,inkastooy aanay ardeydaasi galin jaamicadaa.

Kooxda  koowaad ee  uu  Ibraahin Maygaag ka mid noqday waxaa la dajiyey  magaalada Long Island, kana mid noqdeen ardeydii Jaamicada Adelfa (Adelphi  College) oo ay ku qaateen halkaa  hal gu'.Heerka aqoonta(Academic status) ee ardeydan oo aad u sareysay ayaa jaamicadani u cuntami wayday,codsadeyna  in meelo ka wanaagsan la geeyo.Waxaa xusid mudan in dawladii Maraykan ay soo dhaweysay codsigaa.Iyadoo dhamaan heerka aqooneed ee ardeydaasi wanaagsaneyd,haddana waxaa macalimiintii  halkaa ka dhigayey aad uga yaabeen heerka aqoonta ee Ibraahim Maygaag,aanayna soo jeediyeen inaan meel ka yar Yale u qalmin  ardeygaas.Waxaa soo  jeedintaas ku qancay hogaankii Jaamicada Yale. Jaamicada Yale  waxay  ka mid tahay  jaamicadaha ugu sareeya dalka Maraykanka aanay ka soo baxaan madaxda wadanka Maraykanku.

Ardeydii kale ee Ibraahim Maygaag la socotay waxaa  la kala geeyey  jaamicado kale sida Cabdilaahi Gaaxnuux iyo Maxamed Towfiiq oo la geeyey Jaamicada gobolka Ilinooy (University of Illinois),Maxamuud  Cabdi Dacar oo la geeyey waxaa la geeyey Jaamicada

Ratjers(Rutgers University) ee New Jersey,halka Maxamuud Mahdi la geeyey Jaamicada ku taala Upstate New York..

Jaamicadaa Yale ayuu Ibraahin Maygaag ka qaatey shahaadadiisii sare ee koowaad (B.A) kuna qaatey cilmiga dhaqaalaha. Ibraahin Maygaag markan wuxuu ku soo noqday dalkii Soomaaliya la isku odhan jiray kana soo qabtey xilal kala duwan .Xilligan oo shaqo la,aani aad uga jirtay dalka ayaa Ibraahim Maygaag ha hawlgalay safaaradii Maraykanka.Markuu xilkii ugu horeeyey ka qabtey dawladii ayuu ka codsadey Jaamicadii Yale in ay siiso deeq waxbarasho. Dabayaaqadii 1966 ayuu Ibraahim Maygaag dib ugu laabtey Maraykanka, galayna jaamicada Yale si uu dhameystirto shahaadada sare ee labaad(M.A).Dabayaaqadii 1967 ayuu Ibraahim Maygaag soo dhameystay shahaadada sare ee labaad(M.A) kuna soo qaatey cilmiga dhaqaalaha.In ka yar hal gu' ayuu Ibraahim Maygaag ku soo dhameeyey shahaadadan dadaalkiisa iyo garaadka dheeraadka ee Ilaahay ku manaystay awgeed.Sidoo kale isla gu'gaa 1967 ayuu Ibraahim Maygaag guursadey xaaskiisa Aamina Jaamac Xasan (Aamina Cadhoole).

Dalka Soomaaliland muu laheyn dugsi sare oo haweenka ah.Aamina Cadhoole waxay aheyd ardeyadii ugu horeysay ee loo diray dalka Maraykanka si ay ugu soo dhameysato dugsigeeda sare. Waxaa dalka Maraykanka ka jiray dugsi la odhan jiray "Secondary School for east African Girls".

Dugsigani wuxuu ku yaalay Framingham ee gobolka Massachussetts ee dalka Maraykanka. Magaalada Framingham waxay ku taalaa duleedka magaalada Boston. Wixii ka danbeeyey xilligaa Ibraahim Maygaag yimid,waxay noqotay deeqda waxbarasho ee Maraykanku fidinayey biyo yaa shuban.Magaalada Boston waxaa ardey ka ahaa dhawr qof oo reer Soomaaliland ah ayna ka mid ahaayeen Cali Khaliif Galaydh, Rigaaxe, Bile Cismaan, Aadan Cabdilaahi, Ismaaciil Buubaa, Xuseen Bulxan, Axmed Maxamed Maxamuud (*Sifir*),iwm.

Ibraahim Maygaag oo ardey ka ahaa laba jeer Jaamicadii Yale oo ku taala magaalada New Haven ee gobolka Connecticut iyo Aamina oo ardeyad ka aheyd Framingham Ayaa ku kulmi jiray magaalada Boston xilliyada fasaxyada.Sad iyo calafna wuxuu sargooyey in Ibraahim iyo Aaminii isku noqdaan "say iyo oori".Aamina Cadhoole markay dhameysey dugsigii sare waxay gashey jaamicad,umayse suurtogalin inay dhameysato oo hablaha inay muddo badan maqnaadaan reeruhu uma ogolaaneyn waqtiyadaa.Intii ay ku jirtay Jaamicada Aamina Cadhoole waxay baratey cilmiga "Children Psychology".Markii ay Aamina cadhoole ku soo noqotay dalkiina waxay ku hawlgashey macalinimo.

Aamina Cadhoole waxay la dhalatey halgamaagii weynaa ee reer Jibuuti Cabdiraxmaan Cadhoole.Maansadii Afrika ee Ibraahim Gadhle waa kii lahaa:

> Waa kuwii Cadhoolana ajalay, calankan awgiiye
> Halyeygii Sheekh Bashiir bay dharaar, adhaxda gooyeene
> Maxamuud sidii loo arjumay, aamus laga qaadye
> Imaam Cusmaan baa ku maqan, ololeheeniiye
> Ablay bay u quudheen nin ragi, kuma ataageene

Fu’aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Ibraahim Maygaag wuxuu la soo shaqeeyey dawladihii kala duwanaa ee soo maray dalkii Soomaaliya la isku odhan jiray. Waxaanu Ibraahim Maygaag ka soo qabtay xilal kala duwan, isagoo dhawr jeer noqday wasiirka hay’ado kala duwan.

Xilli ku beegnayd 1981 ayuu goostay inaanu xilalkaa u sii hayn kareyn dawladii habaarqabto gubdiyeyna iscasilaadiisa markii labaad 1981,halka uu markii hore gudbiyey 1979.Ibraahin Maygaag markan wuxuu dib ugu noqday kordhinta waxbarashadiisii,kana mid noqday ardeyda Jaamicada Kalifornia ee Riverside (University of California, Riverside), dhameystayna gu’gii 1985.Ibraahin Maygaag intuu ku jiray Jaamicadaa wuxuu si laxaad leh uga qayb qaatey halgankii SNM,ilaa uu hormood ka noqday udub dhiskii wadanka Somaliland.Ibraahim Maygaag wuxuu xilal kala duwan ka soo qabtey ururkii SNM ilaa uu noqday gudoomiyaha ku meel gaadhka ee ururkii SNM, ka dibna xil ayuu ka qabtey dawladii ugu horeysay ee loo igmado Somaliland.



Ibraahim Maygaag markaa wuxuu tagey kanada si uu u daryeelo baahidiisa gaarka ee dhinaca reerkiisa. Muddo ka dibna wuxuu u baqoolay wadanka Jabaan, kana noqday barre sare Jaamacida Caalamiga ah ee Josai (Josai International University).

# XILALKII IBRAAHIN MAYGAAG :

Ibraahim Maygaag markuu soo dhameystay waxbarashadii, kana gaadhey heerka sare ee $1^{aad}$(B.A) ayuu go’aansadey inuu dalkiisii hooyo ku soo noqdo.Xilligan uu dalka ku soo noqday Ibraahim Maygaag ee $1965^{kii}$ ayaa dad badan sidoo kale dalka ku soo noqdeen,halka in kaloo badanina ay aad uga dhoofayeen.Waxaa dalkii Soomaaliya rakaadiyey furashada xisbiyo badan oo qabiil hagayo, shaqo la’aan baahdey iyo musuqmaasuq boqno goooyey danihii guud ee ummada.

Markii uu Ibraahin Maygaag yimid ,wuxuu shaqo ka bilaabay safaaradii Dawlada Maraykanku ku laheyd Muqdisho,waxaana lagu qaatey mushahar aad u wanaagsan.Hase yeeshee Ibraahin Maygaag oo arkayey inuu dalkiisa wax u qaban karo ayaa mushaharkaa ka doortay inuu xil ka qabto wasaaradii maaliyada ee dalkii Soomaliya,noqdayna agaasimaha maaliyada laguna qaatey mushahar intuu doono ka yar kii uu safaarada ka qaadanayey.Hase yeeshee Ibraahin Maygaag aad buu ugu qanacsanaa mushaharkan yar.Waxaa dhamaan wasaaradihii laga dareemay hawlkarnimada Ibraahin Maygaag iyo siduu ugu hawlgalay sugida miisaaniyada xilligaa.Madaxdii xilligaa siduu miisaaniyada u

ilaaliyey aan ka helin,hase yeeshee la dhacey maamul wanaagiisa waxaa ka mid ahaa Ina Siyaad Bare(Afweyne) oo markaa ahaa taliyaha ciidamada dalkii Soomaaliya.

Wuxuu Ibraahin Maygaag noqday hormood tusaale loogu soo qaato aqoontiisa maaliyadeed ee uu u huray ummadiisa. Jaamicadii SIPA (Somali Institute of Public Administation) ayaa heshay aqoonyahan ay ardeyda tusaale ugu soo qaadan karaan. "Waxaa had iyo jeer casharada tusaale lagu ladho ahaa Ibraahin Maygaag oo aqoontiisa xeesha dheer ee uu u lahaa maaliyadu hadheysay dalka,waxaanu noo ahaa hormood(role model) ku dayashadiisa la hiigsado" ayuu yidhi Maxamed Beergeel oo ardey ka ahaa jaamicadaa SIPA xilligaa uu Ibraahin Maygaagna ahaa agaasimaha Maaliyada (Budget Director).

Ibraahin Maygaag wuxuu xilkan hayey ilaa gu'gii 1967.Waxaanu Ibraahim Maygaag u dalacey xilka ah agaasimaha guud (General Budget Director)ee wasaarada maaliyada. Waxaa taariikhdu sugaysaa hawlkarnimadiisii loo bogay iyo dad la dhaqankiisii inuu qof waliba soo dhaweeyey. Gu'gii 1969 waxaa dalkii Soomaaliya ka dhacey inqilaab milatari oo aad loo soo dhaweeyey,laguna qiyaaqay erayadii wanaagsanaa ee laga maqlay. Ibraahin Maygaag wuxuu ka mid noqday dadkii ogolaadey la sii shaqeynta maamulkii Milatari. Halka dadka qaarkii markiiba ka boodeen maamulkan milatari, waxaana qaab maanseed diidmada maamulka u soo bandhigay xilligaa 1970 Cabdi Aadan Qays oo sameeyey ruwaayadii " Gaal iyo Islaan, Geelloow yaa idin leh".Waxaaa heesaha ruwaayadaa ka mid ahaa:
-Aduunyooy xaalkaa ba'
-Aduun baa gabadhyahay


Hase yeeshee Ibraahim Maygaag oo ka hadlayey sababta uu ula sii shaqeeyey maamulkaa milatari wuxuu yidhi : " Adeer dawladani waxay ku dhawaaqdey bilawgii inay wax qabaneyso waxna dhisayso, aniguna waxaan u arkay in xilkaan hayo aan ummada wax ugu qaban karo". Aragtidaa cad ee Ibraahim Maygaag uu hawl kasta oo uu ka qayb qaato ka lahaa waxay aheyd arinta aad loogu baadi-sooco ee uu qayrkii kaga tilmaanaa. Ibraahim Maygaag wuxuu ahaa nin aragti cad ka lahaa nolosha iyo wax ka qabashadeeda. Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe) oo fursad u helay inuu Ibraahim Maygaag dhinacyo badan oo nolosha ka mid ah kala hawlgalo ayaa taageeray arintaa yidhina: "Ibraahim Meygaag Samatar, naxariistii janno Ilaahay ha ka waraabiyo innagana samir iyo iimaan ha inaga siiyo e', wuxu dadka kaga duwanaa in uu ahaa caalim mufakir ah oo aragti ka lahaa halgankii hubeysnaa ee dibuxoreynta Qaran, la-soo-noqoshadii madax-bannaanidii Somaliland iyo geeddi-socodka dimuqraadiyadeedba".

Waxaa kaluu Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe) intaa ku daray in fikirka iyo aragtida Ibraahim Maygaag Samatar aanay marnaba ku salaysnayn gole-ka-fuul iyo male-awaal midnaba, balse ay salka ku haysay cilmi-baadhis gunteeda iyo qaradeedaba leh oo uu kaga duwanaa hoggaamiyayaashii qaran iyo kuwii urureed ee ummaddan soo marayba.

Maxamed Beergeel ayaa ku tilmaamay Ibraahim Maygaag inuu ahaa xubnihii ugu waxqabadka badnaa dawladii Ina Siyaad. Waxaanu Maxamed xasuustaa isagoo Ibraahim

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Maygaag ka waramaya sababta uu ula shaqeeyey maamulkaa lehna: "xukuumadani bilawgii waxay muujisay  inay dalka iyo dadka wax u qabaneyso.Qof waliba wuu iska ogaa ama dareensaaa inay noqonayso xukuumad kaligii talisnimo.Hase yeeshee waxaanu garaney in inta ay ogoshahay in wax la qabto  lala shaqeeyo oo dalkaa la dhisayey,dadkaa wax loo qabanayey ee marna Ina Siyaad  lama dhisayn.,waxna looma qabaneyn".


58 / HORN OF AFRICA Volume 4, No. 4

tion. It was a pitiable scene and with no end in sight!)

By then I was among those who persuaded themselves thus: "Despite this terrible situation, the country does not belong to the dictator; it is also ours. We should therefore continue whatever constructive work we can do, tolerate the misdeeds, and leave something for posterity." From a Cabinet position, an Economic Commission to the formation of the Party and Parliament, these ideas guided my actions. Accordingly, I have performed my duties diligently, patiently and responsibly, within the constraints of my personal capacity.

Ibraahin Maygaag  ayaa warqadiisii iscasilaada arintaa kaga waramey oo yidhi: "marka la iska indho tiro xaalada adkayd ee lagu jiray,wadanka muu laheyn kaligii taliyuhu ee waa wadankeenii.Sidaa darteed waa inaynu wadnaa shaqo kasta oo togan oon qaban karno,u dulqaadanaa falxumada,waxna uga tagnaa  jiilka inaga danbeeya".

Gu'gii 1969-1970[kii] ayaa Ibraahin Meygaag Samatar loo magacaabay Agaasimaha Guud ee Wasaaraddii Maaliyada.IbraahiM  Maygaag  ayaa dabayaaqadii 1970[kii] noqday wasiirka Maaliyada.Xilkani wuxuu hayey mudo kooban oo hal sanno(1970-1971)  ku dhawaad ah.Ibraahim Maygaag intii u xilkan hayey wuxuu u hawlgalay inuu kordhiyo miisaaniyada dalka.Wuxuu Ibraahim Maygaag bilaabay safaro kala duwan oo uu dadka ku dhiirigalinayo inay  u hawlgalaan  wax soosaar  si miisaaniyada  iyo dhaqaalaha dalku u kordho.

Waxaa kaluu Ibraahin Maygaag hormood u ahaa ku dhiirigalinta dadka inay  cunaan ama xidhaan  wax soo-saarka dhulka iyo warshadaha dalka  sida dharkii warshada Balcad, Sonkortii warshada Jawhar, hadhuudhka,Digirta ,iwm. "Waxaa wali maankayga ku sugan khudbad uu Ibraahin Maygaag ka akhriyey fagaaro layskugu soo baxey oo uu aad uga warameyey siday ummadui uga bixi karto  dhaqaalo-xumo" sidaa waxaa yidhi Maxamed Beergeel oo markaa  shaqaale ka ahaa Kismaayo hay'adii horumarinta Xoolaha (Accountant Lifestock Development  Agency).Xilligan  waxay aheyd 1971[kii] oo wasiiro dhawr ah oo uu Ibraahim Maygaag ka  mid yahay  tageen Kismaayo,ummadana kula kulmeen fagaare layskugu soo baxey.Ibraahim Maygaag khudbadii uu halkaa ka akhriyey waxay xooga saareysay inaan la noqon ummad shaqaalaha dal kale  masruufta (Consumer Society) ee la noqdo ummad wax soosaar leh (Productive Society).Intii uu Ibraahim Maygaag hayey xilkan isbadal  ayaa laga dareemay ku yimid dhaqaalaha dalkii Soomaaliya, iyadoo la arkayna korodhsiinyo maaliyadeed.

Ibraahim Maygaag 1971[kii] ayaa loo igmadey inuu noqdo wasiirka Warshadaha.Ibraahim ayaa aragtidiisu ku salaysnayd dalka wax u qabo,una adeegso xilka loo igmado fulinta waxqabadka ay bulshadu u aayeyso.Markan Ibraahim wuxuu u hawlgalay inuu kobciyo tayada warshadaha dalkii Soomaaliya uuna kor u qaadey isagoo qaarkoodna xilligaaba dhismahooodu ahaa.Waxaa markaa Ibraahim tayo u yeelay warshadihii dharka ee Balcad, Taraqa iyo Sigaarka, Sonkorta ee Jawhar, Sibidhka ee Berbera, kaluunka ee Laas-qoray,iwm.

Wuxuu Ibraahim Maygaag aad ugu dadaalay inuu dalalkii kaalmada fidinayey qorshe ahaan uga dhigo inay dalka maalgalin ku sameeyaan, hantidana ku hirgaliyaan mashaariic

cusub ama kuwii jirayba kagu kobciyaan. " Ibraahim Maygaag oo gu'gii 1974[kii] noqday wasiirka Qorshaynta ayaa u xilsaarnaa inuu soo diyaariyo ajandaha shir lala galayey wafdi ka socday dalka Kuuba" ayuu yidhi Rashiid Sh.Cabdilaahi oo nooga warameyey hawlkarnimada aqoonyahan Ibraahin Maygaag.

Xilligani waxay aheyd 1974[kii], waxaana dalka yimid wafdi ka socday Kuuba oo ujeedadoodu aheyd in loo tilmaamo siday kaalmo uga gaysan lahaayeen dhinacyada siyaasada,dhaqaalaha,iwm. Waxaa loo xilsaarey soo diyaarinta Ajandaha wasaarada qorshaynta oo uu wasiir ka ahaa Ibraahin Maygaag Samater.Dhinaca golihii xisbigana xubnaha ka socday waxaa ka mid ahaa Rashiid Sh.Cabdilaahi. Waxyaalaha mudan sheegis ee Ibraahim Maygaag ku baadisoocnaa yaabna galiyey Rashiid Sh.Cabdilaahi maalintaa waxaa ahaayeen saddex tilmaamood. Rashiid Sh. Cabdilaahi oo arimahaa ka waramayaana wuxuu yidhi: "Waxay aheyd markii iigu horaysay ee aan Ibraahim Maygaag is aragno, wadashaqeyna na dhex marto,saddex arimood oo yaableh ayaana maalintaa aan aad u xasuustaa". Rashiid wuxuu sheegay tilmaamahan gooni u soocay Ibraahim Maygaag inay ahaayeen:

i- Intaa aan shirkaasi bilaabmin ayaa sheeko wadaag dhex maray xubnihii madashaa fadhiyey.Waxaa muuqatey Ibraahim Maygaag aqoonta xeeldheer ee uu u lahaa dhaqanka iyo suugaanta ummada Soomaaliyeed.Xilligaa waxaa aad dhulka ugu badnaa dad dibadaha wax ku soo bartay oo markay hadlayaan aad looga dareemi jiray siday ugu hanweynaayeen dhaqanka dalkay wax ku soo barteen iyo afka dalkaa lagaga hadlo.Ibraahim Maygaag lama dareemayn inuu dibad wax ku soo bartay,waxaadse moodaysay inuu jaamicada miyiga ka soo baxey siduu uga sheekaynayo dhaqankii ummada, adeegsiga suugaanta,iwm.Wuxuu aad ugu hawneynaa dhaqankiisa Soomaaliyeed.

ii- Wasiirada waxaa aad loogu yaqaanay kibir xad dhaaf ah iyo isla weyni sheegan. Ibaahin aad buu uga madhnaa tilmaantaa,waxaanu ahaa dhulyaal(mutaawadac) si quman noo dhex joogay. Si fudud ayuu noo dhex joogay oo aanad marna dareemayn inuu Ibraahim Maygaag dadka kale ka sareeyey.Qofka cusub ee ku soo biira kulankaa way ku adkaan laheyd inuu sheegi karo mas'uulka ugu sareeya ee hagaya kulankaa.

iii- Markii uu Ibraahim Maygaag bilaabay inuu soo bandhigo Ajendihiii, waxaa soo baxdey aqoonta xeeldheer iyo aragtida fog ee Ibraahim ku ladhan oo uu had iyo jeer xoogga saarayey in dalka la dhiso,maalgalina lagu sameeyo,qoladan reer Kuubana ay maalgalin ku sameeyaan beeraha, warshadaha, iwm..Halka dadka kale ay iyagu rabeen in dhaqaalaha laga helo wadamada kaalmada bixinaya gacanta loo galiyo oo ay maamulaan, Ibraahim wuxuu door bidayey in dalka la galiyo oo ummadu yeelato faa'iidada ka soo baxda kaalmadaa dhaqaale.

Gu'gii 1974[kii] waxaa dalka ka dhacdey Abaartii Dabadheer. Waxay abaartani saameyn xoog leh ku yeelatay gobolka Togdheer ilaa Gobola Mudug.Xilligaa Ibraahim Maygaag isagoo wasiirka qorshaynta ah ayuu dalka dibadiisa u baxey si uu kaalmo ugu soo helo daryeelka dadka ay saameysay abaartaasi.Iyaba waa isla doonasho Illaahee, waxaa markaa haystay baanka aduunka (World Bank) Mr.Robert McNamara.Sarkaalkani wuxuu wasiirka

difaaca ka ahaa dawladii madaxweyne John Kennedy ee dalka Maraykanka ,markuu Ibraahin Maygaag ku jiray jaamicada Yale. Mr.Robert McNamara Wuxuu la lahaa jaamicada xidhiidh cilmi baadhiseed.Tani oo suurtogalisay inay IbraahimMaygaag iyo Mr.Robert McNamara kulmaan.Markii Ibraahim Maygaag uu u sheegay Mr.Robert McNamara abaarta ka dhacdey dalkii iyo sida kaalmo degdeg ah loogu baahan yahay. Mr.Robert McNamara oo aad u yaqaanay hal adeyga,waxqabadka, iyo aqoonta xeeldheer ee uu Ibraahim lahaa wuxuu fuliyey codsiyadii Ibraahim Maygaag.Tani waxay ka mid tahay tusaalayaasha tirada badan ee muujinaya sida qofka mar uun la kulma Ibraahim Maygaag uu ugu soo joogsanayo si milgo leh.

Safarka Ibraahim Maygaag waxaa kaluu cagta soo mariyey dalka Jarmalka. Dalka Beljam waxaa markaa dawlada Jarmalka Galbeed uga wakiil ahaa nin ay Ibraahim Maygaag aqoon isku lahaayeen.Wuxuu ninkaasi u sheegay inuu kaalmo u heli karo haddii Ibraahim Maygaag ogolyahay inuu warbaahinta Jarmalka ka hadlo.Ibraahim Maygaag wuu ogolaadey,lagana wareystay warbaahinta Jarmalka ee maqal iyo muuqaalka ah(German TV).Halkana waxaa uga suurtogashey inuu dhaqaale kale ka helo.Dadaalka uu u galay Ibraahim Maygaag hawshan isagoo kaga hadlaya warqadisii iscasilaada ee 1981^kii wuxuu lahaa: " Siyaasada iyo waxqabadkii dhawrkii gu' ee ugu horeeyey ilaa laga gaadho taakulayntii laga gaystay abaarihii 1974^kii waxay mudan yihiin xusid heersare ah. Kaalintaydii wax ku-oolka aheyd ee xilligaasina uma baahna markhaati la soo joojiyo".

Waxaa horaantii 1974^kii dalka ka dhacdey tirokoobkii dadka ku dhaqan dalkii Soomaaliya.Tiradii ka soo baxdey may farxad galin maamulkii Afweyne. Waxaa tirokoobka oo in la baahiyo la diiday ku soo baxdey in Koonfuri noqotay 1.7 milyan,halka woqooyigu(Somaliland) noqotay 1.3 milyan. Tirokoobkani waxa kale oo uu daahfuray in degaanada la tirokoobay ay ka soo baxdey in reeraha uu Afweyne ka soo jeeday gobolo badan ka madhan yihiin.Abaartani waxay aheyd fursad fiican oo degaamo gaar ah la badhxo ama la barobixiyo. Waxaa loo raray dadkii abaartu saameysay degaanada Jubada Hoose iyo Jubada Dhexe loona bixiyey degaanadan la dajiyey dadkaa "danwadaagaha". Rashiid Sh.Cabdilaahi ayaa sheekooyinka gaarka ah ee uu Ibraahin Maygaag la wadaagey waxaa ka mid ahayd in uu Ibraahim Maygaag yidhi: "Waxaa 1975^kii soo baxdey natiijadii tirokoobkii dalka.Waxay noqotay mid aan Afweyne raaligalin oo muujisay in degaanada woqooyi(Somaliland iminka),Gobolka Hiiraan ,iwm aanu taageero badan ku laheyn. Waxaana la gartay in dad lagu beero degaanadaa.Qaxootiyadii waxaa la dajiyeye degaanadan si ay u badhxaan ama u barakiciyaan".


Xilli ku beegnayd 1976^kii ayaa la aasaasay Xibsigii Hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed (XHKS)- Somali Revolutionary Socialist Party-.Waxaana markan la baabiiyey Golihii Sare ee Kacaanka(SRC).Waxaa markan Ibraahim Maygaag loo doortay hogaanka arimaha Xisbiga.

Gu'gii 1979^kii ayaa doorasho ku sheeg baarlamaan la qabtay .Waxaa la qabanqaabiyey kulan loogu dabaaldego hawshaa doraasho ku sheeg ee la macmalay.Tani waay u haeyd Ibraahim Maygaag fursad uu ku codsan karo shaqo tagis uu muddaba maaganaa. Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe) oo habeenkaa halkaa ku sugnaa ayaa yidhi: "Xafladdaa goob-joog ayaan ka ahaa oo wixii ka dhacay maalinta qiyaamaha waa la ii soo

fadhiisiyaa. Ibraahin Meygaag Samatar, nasiib wanaag wuxu ka mid noqday dadkii lagu marti-qaaday in uu madashaa ka hadlo.Markii uu cabbaar ka sheekeeyay madasha iyo sida loo bilay, ayuu shaqo-ka-tegis halkaa kaga dhawaaqay isaga oo Siyaad Barrena ka codsaday in uu ka oggolaado. Ibraahin Meygaag wuxu madashaa il-yartu is-qabatay ka sheegay in uu baylah badan oo qoys uu leeyahay, jecel yahayna in uu u ambo-baxo. Macallinkii Siyaad Barre ahaa oo Ibraahin Meygaag hadalka uga danbeeyay sidii iyo halkii ayuu Ibraahin shaqo-ka-tegistii kaga oggolaaday”.

Waxaa 1980kii la tirtiray Xisbigii Hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed,iyadoo boodhka laga tumay Golihii Sare ee Kacaanka(SRC),looguna wanqalay labakacleynta kacaanka.Xasan Xaaji Cabdilaahi”Xasan Ganay” ayaa ka tiriyey maansada Fiidmaar:

Maxaa loo fiigayaa. Fiidmeereey waa aroor.
Maxaa boog fadhida neceb Gacmaa lagu fiiqayaa.
Fiidmeereey waa aroor
Maxay habar fooxisiyo Faal been kuu sheegayaan.
Fiidmeereey waa aroor.
Maxaa fiqi saahidiyo. Intii faral iyo sunneba.
Sujuud ugu foorartaa. Ilaahbaa ferej baxshee
Baryada samada u furan. Maqbuullada laga fasaxo
Far iyo suul lagugu qaad. Habaar kuusoo faraa
Fiidmeereey waa aroor. Maxaa foojiganayaal.
Guushooda u fooganiyo. Bulshada faydane ku jira.



Ibraahim Maygaag shaqadaa markuu ka tagey waxay u aheyd nafis(relief).Wuxuu dareemay in culays badani ka dhacey.Waxaa Ibraahim Maygaag dhib badan ku haysay inuu xil ka hayo maamul qaran dumis ah. Maamulkii dawladaa habaarqabto “Afweyne” ayaa kartida iyo aqoonta Ibraahim Maygaag is yidhi adeegso,una igmadey isla gu’gaa 1979kii inuu noqdo danjiraha dawladii Soomaaliya u fadhiya cariga Jarmalka Galbeed magaalda Boon .Xilkan cusubi Ibraahim Maygaag wuxuu u ahaa mid u fuduaynaya hawlaha halganka uu u diyaar garoobay,waxaanu u arkay inay dawladaasi u tamarisay gudashada halgankii lagaga hortageyey dawladii habaarqabto.

Muddo yarba kumuu nagaan xilkaas ee Ibraahim Maygaag wuxuu u gudbiyey gudashada halgankii uu u igmanaa,qorayna waraaqdii gilgilshay xaruntii madaxtooyada ee dawladii Afweyne.Isla Gu’gaa 1981kii Ibraahim Maygaag wuxuu u socdaalay dalka Maraykanka, noqdayna qofkii Soomaaliyeed ee ugu horeeyey ee magangalyo siyaasadeed dawlada Maraykanku siiso. Deganaanshahan loo ogolaadey wuxuu fududeeyey inuu qabto xilkii wakiilka ururkii SNM ee woqooyiga Ameika ( USA iyo Canada).

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Gu'gii 1984kii ayuu Ibraahim Maygaag yimid magaalada London.Ibraahim Maygaag Samater iyo Axmed Maxamed Siilaanyo oo iminka ah madaxweynaha wadanka Jamhuuriyada Somaliland ayaa safar u wadagalay dhinacaa Itoobiya ee ay ku yaaleen xarumihii ururka SNM.Waxaa magaalada Adis-ababa labadaa hormood ku soo dhaweeyey Mujaahid Rashiid Sh.Cabdilaahi(Rashiid Gadhweyne) oo ahaa xoghayaha idaacadii Halgan dhinaca SNM, xil ku meelgaadhnimo ahna u ahaa wakiilka SNM ee Adisababa . Rashiid Sh.Cabdilaahi warbixina siiyey labadoodaba, gadhwadeena uga sii noqday safarkii ilaa magaalada Jigjiga oo shirkii afraad ee golaha dhexe ku qabsoomayey.

Bishii Ogoosto 1984kii ayaa xilkii hogaamineed kaga dhanaa Mujaahid Cabdiqaadir Koosaar(IHUN).Waxaa markan loo diyaarsanaa doorashada hogaamiyaha cusub.Madashaa si kalsooni leh looa wada dhan yahay waxaa guddomiyaha shirka xil ahaan loogu igmadey Ibraahim Maygaag oo aad looga dharagsanaa,inkastooy aheyd Ibraahim Maygaag markii ugu horeysay ee uu yimaado jiidaha hore ee halgankii SNM.

Shirkan waxaa isafgaranwaa iyo talo isla seeg ka dhex dhacey xubnihii askarta,wadaadii, siyaasiyiintii,iwm.Waxaa lagu nastay aadna layskugu soo dhawaadey markii uu Ibraahim Maygaag hogaanka u qabtey dhexdhexaadinta xubnahan ururka.

Markii shirkaasi dhamaadey waxaa bilaabmay shirkii aasaaska golaha guurtida.Ibraahim Maygaag waxaa loo tiriyaa inuu kaalin weyn ku lahaa aasaaska golaha Guurtida.Ibraahim Maygaag wuxuu aad u aaminsanaa inaan hab siyaasadeed aan wadan hab dhaqankeena odayaashu aanu hanoqaadeyn.Sidaa darteed ayaa Laaqeyrta Doobiray isla gu'gaa 1984 lagu qabtey shirkii u ahaa bud-dhiga aasaaska golaha guurtida.Abaar ba'an oo jirtay shirkaa muddo badan lama fadhiyi karin,waxaana dib loogu riixay in shir kale la qabto.

Shirkii 2 ee lagu falanqeeyo qaab dhismeedka golah guurtida ayaa ku qabsoomay Dooxada Daahir-maadhiin oo dhinaca galbeed kaga beegan magaalada Rabaso.Waftigii shirkaa waxaa hogaaminayey Ibraahim Maygaag Samater.Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(boobe) oo xubnihii waftigaa ka mid ahaa ayaa yidhi: "Waxa aan ka mid ahaa wefdi SNM ah oo uu madax ka ahaa Ibraahin Meygaag Samatar oo Shirweynahaa 2aad goob-jooge ahaan uga qayb-galay. Goobtaana Ibraahin Meygaag Samatar maalmo ayaanu wada joognay ilaa intii Shirweynahaa 2aad ee Guurtidu ka dhammaanayay". Xilligan dhulku barwaaqo ayuu ahaa oo muddo waa lagu nagaan karayey shirkaas.

Ibraahim Maygaag dhinaca Maraykanka ayuu u noqnoqon jiray.Gu'gii 1985kii ayaa waxaa imaatinkiisii Ibraahim Maygaag ku wehelinayey inankiisa kaliya ee Raage Ibraahim Maygaag. "Ibraahim Maygaag oo jiidaha hore ee dagaalka kula jiray dhalinyaradii halganka ayaa waxaa u cuntami wayday inuu inankiisa gayn waayo jiidahaa hore, waxaanay tani Ibraahim Maygaag ka dhigaysaa siyaasiga kaliya ee sidaa" ayuu yidhi Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taanimar uu ka hadlayey baroordiiq Ibraahim Maygaag loogu sameeyey magaalada Ottowa ee dalka Kanada.Waxaa taageeray oo sii xoojiyey mujaahid Axmed Maxamed Jabane oo ka mid ahaa dhalinyaradii UFO iyo Mujaahid Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe).

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Gu'gii 1986[kii] ayaa Ibraahim Maygaag xilligan waxaa loo doortay xubin sharafeed aan xil gaar ahaaneed loo cayimin.Hase yeeshee hogaamiyihii xiligaa ee SNM ayaa go'aansadey inuu tago carro Ingiriis xilkii ururka SNM-na si ku meelgaadh ahaana ugu wareejiyey Ibraahim Maygaag. Dadka qaar waxay yidhaahdaan gudoomiye Axmed Maxamed Siilaanyo gartiisii ayuu akhristay,go'aansadeyna inuu si fudud xilkaa u gudbiyo.Halka ay jiraan xubno ka mid ah ururkii SNM oo qaba ra'yi kaaka duwan.Mudadii uu Ibraahim Maygaag hayey xilkan gudoomiyenimada ururka SNM waxaa lagu qiyaasaa ilaa lix bilood ku dhawaad. Waxaa qabsoomay mudadan waxyaalo badan oo ay mudan tahay in la xuso.Waxaa runtii jirid la'aan ku dhawaadey isafgaranwaa ka dhex dhacey gudoomiyihii xilligaa iyo saraakiisha. Tani waxay aheyd waxyaalaha aadka u muujiyey in xilalkii saddexda (Gudoomiyaha ururka, Gudoomiyaha golaha dhexe iyo Gudoomiyaha fulinta) ahaa ee uu gudoomiyuhu hayey in la kala qaado oo qaarkood cid aan gudoomiyaha aheyn loo igmado.Guulo waaweyn oo la taaban karo ayaa la gaadhey mudadan uu Ibraahim Maygaag xilka gudoomiyenimada hayey,iyadoo waqtiguna aad u yaraa.

Dhinaca SNM , guul weyn bay kala kulantay qaabkuu xilka Ibraahin Maygaag u hayey. Waxaa fulay dilkii gudoomiyihii Nabadsugida ee Kornayl Axmed Aadan, Waxaa Dawlada Faransiisku ku riyaaqeen siday SNM ka yeeshay xubnihii ka tirsanaa "Medicine sans Frontier" ee agagaarka Wajaale lagu soo qabqabtay..Arintani waxay abuurtay xidhiidh wanaagsan oo ka dhexeeya SNM iyo dalwadii Faransiiska.Waxaa dagaalo xeebta iyo bariga qaadey saraakiishii SNM oo saad, talo iyo tilmaanba u madaxbanaanaadey , garab iyo gaashaana ka helay Mujaahid Ibraahin Maygaag..

Mujaahid Rashiid Sh. Cabdilaahi oo arintaa MSF ka waramaya ayaa yidhi: "1986 wuxuu noqday gudoomiyaha ku meel gaadhka ee SNM, waxaa xilligaa dhacay qabashadii shaqaalihii Medicines sans Frontiere (MSF)".

Waxay arintani aheyd dhib weyn oo dhaawac warbaahineed iyo fikradeed soo gaadhsiisay ururkii SNM,waxaase tilmaan mudan qaabkii uu Ibraahim Maygaag u xaliyey.Markiiba wuxuu u hawl galay siduu gacanta ugu dhigi lahaa shaqaalahaa ee loo daryeeli lahaa, wuxuu u qaadey Addis-Ababa,gacantana ka galiyey safaaradii Faransiiska.Waxaa markiiba dawladii Afweyne u adeegsatey arintaa in ay SNM tahay urur argagixiso ah oo safaarado badan u dhagonuglaadeen..Waxaa fursad fiican noqotay in ay shir jaraa'id soo qorshaysay safaaradii Faransiisk.Dawlada Itoobiya may doonayn in ay muuqato waxaa markaa Ibraahim Maygaag goostay inuu shirkaa jaraa'id ka jeediyo hadal. Rashiid Sh. Cabdilaahi oo sii wata hadalka ayaa yidhi: "Waxaanan u hawlgalay sidii ay taasi u suurtogal noqon laheyd waxaa markuu shirkii jaraa'id dhamaadey aan qabsadey cod baahiyaha una sheegay inuu ku simihii gudoomiyeha SNM joogo, weedh koobana ka soo jeedinayo halkaa,dadkii ayaa kuraasida dib u boobay".
Ibraahim Maygaag halkaa wuxuu ku bilaabay wanaaga ay ururkana MSF wadeen, ka dibna u gudbay qaxootiga hubaysan oo dhib,dhac ,boob iyo dil joogto ahna u gaysta dadkii deganaa degaankaa oo colaad hor leh abuurtay .Wuxuuna aad uga waramey inay taasi keentay in askar ciidmada SNM ka mid ahi ay ka falceliyaan falxumada qaxootigu ku kacayo ee marna arinka SNM muu aheyn dhib loo geysto ururka MSF.Waxaana taa muujinaya sida loo hayey ,loona soo gudbiyey ee ay iyaguba mahadnaq badan uga jeediyeen.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Markii Ibraahim Maygaag dhameeyey warbixintii ayaa safaaradihii joogay waxay aad ula dhaceen aftahnimada, iyo aqoonta diblomaasiyeed ee uu muujiyey .Sacab iyo waji farxadi ka muuqato ayaana loogu falceliyey weedhihii Ibraahim Maygaag..Halkaa guul weyn baa uga soo hoyatey ururka SNM,guuldarana waxaa la hoyday maamulkii Afweyne oon dhalingoolkaa ay tirsanayeen.

## XIL KA TAGIS:

Ibraahim Maygaag xilal dhawr ah ayuu ka soo qabtay dawladihii kala danbeeyey ee dalkii Soomaaliya.Ibraahim Maygaag wuxuu aaminsanaa inuu xil kasta u adeegsanayo barwaaqeynta dalka iyo dayactirka baahida dadka.Hase yeeshee markii uu arkay inaanu u gudan karin xilkaa sida uu u arkayey,wuxuu go'aansadey inuu ka tago.1979[kii] ayuu shirkii golaha xisbiga uu xilkii dawlada si cad isagoo codbaahiyaha haysta uga sheegay inuu ka tagayo.Madaxweynaha Dawladii habaarqabto Ina Siyaad oo halkaa fadhiyey ayaa isagoo codbaahiyaha ka daba qaatey ka gudoomay Ibraahim Maygaag xil ka tagistaas.

Muddo ka dib ayaa Afweyne oo kartida iyo aqoonta Ibraahim Maygaag aad ugu kalsoonaa, intaanu madaxweynaha noqona aqoon fiican u lahaa u igmadey safiirka Jarmalka Galbeed.Ibraahim Maygaag wuu ogolaadey xilkan danbe.Isagoo Ibraahim Maygaag ka waramaya sababta keentay inuu ogolaado xilkan danbe wuxuu ku xardhay warqadiisii iscasilaada ee 1981[kii] erayadan: "Waxaan filayey in xilkan danbe iigu deeqayo magangalyo aan wadankayga wax u qaban karo,islamarkaana ka soo fogaanayo cadhadii iyo wareerkii ay laheyd cimilada siyaasadeed ee Muuqdisho…".

Bishii Abril 6[dii],1981 ayaa lagu dhawaaqey ururkii SNM.Tani waxay Ibraahim Maygaag u aheyd guul uu ku diirsadey.Maadaama aanu wali ururku yeelan saldhig Milatari oo xoogan, marka laga reebo jabhadii Afraad iyo dhawr sarkaal oo talaabey, Ibraahim Maygaag wuxuu fahmay inuu ururkani u baahan yahay dagaalka warbaahinta oo la xoojiyo.Bishii May,1981 ayuu gudbiyey Ibraahim Maygaag warqadii shaqo ka tagistiisa.Warqadaasi waxay kaalin mug leh ka qaadatey dagaalkii warbaahineed ee lagaga soo horjeeday maamulkii Afweyne. Sidoo kale waxay neecaw lagu doogsadey u noqotay dadkii maamulkaa si qarsoon iyo si cadba uga soo jeeday.Ibraahim Maygaag markuu arkay inaanay filashadiisii suurtogal aheyn ayuu xil dawladeed gabi ahaantiiba iska casilay,waxaanu yidhi: "Sidaad ula socoto (Afweyne) waxaan ka tagey xilkii safiirnimada Jarmalka Galbeed bishii May 1981[kii], waxaanan ku wareejiyey xilkii ku xigeenkayga.Tani waa warqadii shaqo ka tagistayda maaha oo kaliya xilkan daljironimo,laakiin waa dhamaan gudashada xil dawladeed".

Ibraahim Maygaag oo sii wada ka waranka sababtuu xil dawladeed dhamaantii uga tagayo ayaa warqadaa iscasilaada ku sheegay: "Si tartiib tartiib ah waxaan ugu qancay in ay gef tahay in lagula (Afweyne) shaqeeyo heer kasta oo xil ahaaneed.Markasta oo siyaasi ogaado maamulka uu xubin ka yahay inaanu fulinaynin danta sharciga ee ummada,wuxuu (siyaasigaasi) xaq u leeyahay – hubaashii waa hawl la gudboon - inuu iskaga tago dawladaa".

Ibraahim Maygaag wuxuu ku ladhay sheegistaa sababtaa hab dhaqankii Afweyne siduu ahaa,waxaanu yidhi: " Markaanu annagu ku hawlanayn xoojinta danaha qaranka,waxaad guntaysay habkii iyo xadhkihii kalitalisnimada.Laakiin ha u malaynin in aanay dadku ogayn,dadku doqomo maaha, waxaase kaa daahneyd inaanay dadku cida haysa maamulka isku mashquulinayn ee ay u hanqal taagayeen maamul ay ka dhab tahay daryeelida dhibaatooyinka ummadu.Dadku waanay kuu sacabiyeen markii khudbadahaagii iyo falalkaagii ugu horeeyey ay ka balanqaadeen sidaa".

Waxay warqadan iscasilaada ee Ibraahim Maygaag muujinaysay inuu Ibraahim Maygaag aad uga fiirsadey,sidii u caadada aheydna ku ladhey cilmi baadhis sababeynta shaqo ka tagistiisa. Warqadani waxay saameyn weyn ku yeelatay dadkii kale ee xil dawladeed hayey markaa,waxaanay dhiirigalin u noqotay xubnihii u badheedhay inay furaan ururkii SNM isla gu'gaa 1981[kii].

## AQOONTA IBRAAHIN MAYGAAG:

### Qoraalo:

Wuxuu Mujaahid Ibraahin ahaa aqoonyahan aad ugu fiican adeegsiga qalinka iyo wax akhriska.Had iyo jeer waxaa aad loogu xasuustaa ka hadalka buug cusub oo uu akhriyey. Waxaase aan marna laga tageyn in laysku raacsan yahay inuu tiro buugaag ah si fudud ku qori kari lahaa,Ilaahay baanse ogolaan sidaas.

Wuxuu wax ku soo qori jiray Jariiradii Dalka.Waxaa had iyo jeer ummadu aad u xiisayn jirtay qoraalada ku saabsan dhaqaalaha ee uu Ibraahin ku xardho wargeyskaa Dalka. Ardeyda dugsiyada ayuu qoraalka Ibraahin Maygaag tilmaan gaar ah u lahaa,had iyo jeerna u heelanaa akhrintiisa.Wuxuu Ibraahin wax ku qori jiray jariiradii "Somali Horizon" ee halganka ummada Somaliland qayb weyn ka qaadatey.Waxaa Ibraahin Maygaag qoraaladiisa u heelanaa wargeysyada aduunka.Wargeyska Horn of Africa ayaa si farshaxnimo leh u soo bandhigay qoraalkii Ibraahin "Letter of My Resignation" uu ku cadeynayey sababta uu xilka ugu sii hayn waayey dawladii habaarqabto ee Ina Siyaad. Wargeyska Alcaalamiya ayaa wareysi dheer oo uu Ibraahin kaga waramayo dhibtii iyo hagardaamadii ay dalka iyo dadkaba ku haysay dawladii habaarqabto si qurux badan ugu soo bandhigay.Wargeyskani waxay garteen inuu Ibraahin mudan yahay inuu noqdo "Front Page story" , marka la eego aqoonta Ibraahin Maygaag iyo qaabkuu u soo bandhigay warbixintaa bishii.

## Dood: Aqoon la wadaag:

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Mujaahid Ibraahim Maygaag wuxuu ahaa nin aragti dheer leh,Ilaahayna ku manaystay aftahanimo iyo codkarnimo sida loogu babac dhigaana ay aad u adkayd.Wuxuu mujaahid Ibraahim Maygaag aad ugu dhiiranaa ka hadalka wuxuu aaminsan yahay,isagoo waliba u heelanaan jiray difaaca wuxuu aaminsan yahay.Tiraba dhawr jeer ayuu doodo caalami ah ka qayb galay ama isagu gadhwadeen ka ahaa.Waxaana kuwaa ka mid ahaa:

-1971[kii] waxaa kormeer shaqo iyo wacyi galinta dadweynaha u tagey maagalada Kismaayo dhawr wasiir oo uu ka mid ahaa Ibraahim Maygaag Samater. Waxaa dadweynihii reer Kismaayo la dhaceen habeenimadii oo uu khudbad la yaab leh u jeediyey Ibraahim Maygaag. "Habeenimadii ayaa fagaare weyn laysku soo baxey,khudbadii Ibraahim Maygaag habeenkaa halkaa ka akhriyey ilaa iminka sideedii ayey wehel iigu tahay" ayuu yidhi Maxamed Beergeel oo shaqaale ka ahaa magaaladaa .Wuxuu Ibraahim Maygaag aad uga waramey waxyaabaha keena inay ummadi horumarto ama dib u dhacdo wuxuu si qoto dheer uga hadley in ummada adeegsata wax dhulkeeda ka soo baxaa ka horumarsan tahay bulshada adeegsata waxa dhul kale ka yimid.Wuxu sheegay in ummadu noqoto ummad wax soo saar leh (Productive Sociey), aanayna ka baxdoahaanshaha ummad bixisa mushaharka shaqaale dal kale (Consumer Society). Wuxuu markaa tusaalayaal u soo qaatey sida bariiska iyo baastada inta la jecelyahay lagana ordayo digirta, hadhuudhka, arabikhida, dharka warshada balcad inaanay muuqan karin horumar la hiigsado iyo wax soosaar la beegsadaaba.

-1973[kii] waxaa dalkii Soomaliya laysku odhan jiray lagu qabtay dood lagaga hadlayey sida dunida saddexaad dhaqaalaheeda u tamarin karto, reer Galbeedkana loola jaanqaadi lahaa. Waxaa doodaa ka qayb galay Walter Rodney oo u dhashay dalka Guyana ee Koonfurta Amerika, hase yeeshee xilligaa bare sare ka ahaa Jaamicada Darasalaam. Waxaa kaloo ka qayb galayey Xuseen Tansaani oo markaa bare sare ka ahaa Jaamicadii Lafoole.Sidoo kale waxaa ka qayb galayey Abyan(IHUN) oo Jaamicadii Lafoole barre Sare ka ahaa.Doodan waxaa hogaaminayey hagayeyna aqoonyahan sare mujaahid Ibraahin Maygaag Samatar oo markaa ahaa Wasiirka Qorshaynta.Waxaa maanku marna sii daynin ee dadkii halkaa joogay la dhaceen hordhacii iyo gundhigii uu Ibraahim Maygaag halkaa ka soo jeediyey. Wuxuu sugay in ummad isku kalsoon la noqdo.Tani waxay suurtogalinaysaa inuu qofku wuxuu soo saarto ku faani karo,halkuu wuxuu dal kale soo saarey cunistiisa iyo xidhashadiisa u heelan yahay.Gundhigii Ibraahin wuxuu sheegay inaan colaad loo qaado reer galbeedku aanay xal aheyn, halkay doodayaashu reer galbeedka eedda saarayeen. Waxaase Ibraahin ku gunaanadey "Markaad diyaar u tahay inaad daadiso waxaad haysato ayey reer galbeedku kula ganbiyaan". Waa eray xeeldheer kana soo fulay aqoonyahan ildheer.

-1975[kii] Waxaa dalkii Soomaaliya laysku odhan jiray lagu qabtay dood aqooneed lagaga hadlayey sida dunida saddexaad dhaqaalaheeda u tamarin karto, reer Galbeedkana loola jaanqaadi lahaa.Waxaa doodaa ka qayb galayey Samiir Amiin oo Masri ahaa, barre sarena ka ahaa Jaamicada Senegal,waxaa la doodayey aqoonyahan sare Mujaahid Ibraahim Maygaag Samater oo ahaa wasiirka Qorshaynta. Samiir wuxuu ku doodayey in wadamada horumaray ay adoonsigoodii ku sii wadaan dunida saddexaad,waxaanu sal uga dhigay Center iyo Periphery (Disengagement from Capitalism Market). Wuxuu ku tilmaamay inay dunida horumartay tahay "Center",ay dunida saddexaadna tahay "Periphery".Waxay labada

aqoonyahan isku afgarteen in habdhaqankaasi jiro dhabna yahay,hase yeeshee waxay ku kala tageen xal u raadinta uurkutaalada meesha taala. Samiir wuxuu ku doodayey inaan waxna laga iibin, waxna laga iibsan ee laga go'o.Waxaa arintaa si cad uga soo horjeeday aqoonyahan Ibraahin Maygaag Samater oo ku doodayey si xidhiidhkeenuna u jiro,halkay iyaguun faa'iidi lahaayeena loo wada faa'iido ha la samaysto iskaashato sida OPEC oo kale oo tusaale ahaan wadamada Bunka iibgeeyaa ha samaystaan urur,qaab urur ahaana ha ku suuqgeeyaan waxay iibinayaan.Waxaa dadkii goobta joogay sacab iyo damaashaad lagu soo dhaweeyey xalkii (Solution) uu Ibraahim Maygaag soo jeediyey,Samiirna aad ugu farxay sida quruxda badan ee uu Ibraahim Maygaag u balbalaadhiyey una soo bandhigay xal u raadinta hagardaamada dunida saddexaad ee xagga dhaqaalaha ka haysata.

-1981 Wuxuu Ibraahim Maygaag ka goostay xukuumadii milatariga aheyd.Hase yeeshee tiisani waxbay dadka dheeraydd.Ibraahim Maygaag wuxuu qoray warqad dheer oo uu kaga waramayo sababtuu ula shaqeeyey maamulkii Afweyne, iyo sababtuu kaga tagay maalintaa.Warqadani waxay dhamac ku noqotay maamulkii Afweyne, waxaanay dhiirigalin iyo kalsooni ku beertay qof kasta oo maamulkaa ka soo horjeeday. Wuxuu Mujaahid Ibraahim Maygaag tilmaamay in maalintii uu xukunka qabsadey Afweyne uu arkayey in kaligii taliye taladii la wareegay ahaa,hase yeeshee uu ku baaqay waxqabad iyo dalkoo la horumariyo.Tani waxay Mujaahid Ibraahim Maygaag ku kaliftay inuu u dhabar-adaygo, xilalkii kala duwanaa ee uu Ibraahim Maygaag qabtayna waxaa ka muuqanaysa siduu mar walba dalka horumarkiisa iyo hanaqaadkiisa ugu igmanaa.Hase yeeshe wuxuu tilmaamay in uu maamulkaasi hubka u qaatey burburka dhulka,dhaqanka iyo talowadaag la filayey.Tanina aanay aheyn mid Ibraahim Maygaag u dulqaadan karo, kaynta oo la galo iyo qori la qaatana uu ka doorbiday noloshii raaxada laheyd ee uu ku haystay Jarmalka Bari.

-1995kii waxaa dalka Maraykanka magaalada Boston lagu qabtay shir lagaga hadlayey arimaha dalkii laysku odhan jiray Soomaaliya.Waxaa dadkii ka soo qayb galay ka mid ahaa Mujaahid Dr.Ibraahim Maygaag Samater, Mujaahid Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale,Mujaahid Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani, Dr. Boutrous Boutrous Ghali. Mujaahid Ibraahin Maygaag halkaa wuxuu ka jeediyey warqad uu sumad uga dhigay mugdiga iftiin baa ku ladhan ( The light At the end of the tunnel).Warqadaasi waxay ka warantay socdaalkii dimuqraadiyeed ee hagayey ururka SNM iyo siduu gogol wanaagsan ugu noqday dhismaha Somaliland.Waxaa kaluu tilmaamay in guulahaa iyo waayo aragnimada SNM at tahay ta keentay isbadal horumarineed ee u dhaxeeya Soomaliya iyo Somaliland.Aad baa goobjoogayaashii ugu bogeen warbixintaa cilmiyeysan ee uu gudbiyey Ibraahim Maygaag.

## IBRAAHIN IYO HALGANKII WARBAAHINTA:

Warbaahinta ayaa ah qalabka casriga ah ee loo isticmaalo dagaalada casriga ah.Ibraahin Maygaag oo aqoontiisa diimeed iyo maadiba xeeldheerayd ayaa fahansanaa awooda ay warbaahintu leedahay.Ibraahim Maygaag ayaa 1981 goostay inuu xilkii safiirnimo ee uu dawladii habaarqabtio u hayey iska casilo.Hase yeeshee Ibraahim Maygaag way la noqon

wayday inuu af ahaan uun kaga dhawaaqo,waxaanu dalalka kaalmada ku horaya xukuumadii Milatari iyo dadweynihii Soomaaliyeed ee u heelanaa dhiirigalin u soo bandhigay qoraal qoto dheer. Ibraahim qoraalkaa wuxuu si faahfaahsan uga waramey inaanay dawladaasi u qalmin la sii shaqeyn danbe,dalalka heshiiska la ihina ay dib uga fiirsadaan xidhiidhka ay la leeyihiin.Magaalada Muqdisho oo xarun u aheyd dawladaa keligii taliska aheyd warqadani waxay ku noqotay holac ku gubay maryahay xidhnaayeen.Waxay dadi kari waayeen ceebahoodii uu Ibraahin bulsho weynta aduunka la wadaagay.

Mr. President:

The Somali people, peace-loving and patriotic as they are, have been patient enough. But there is a limit to everything. The abuse of their humanity, the degradation, the pillage, the rape, the massacre reached beyond the point of tolerance. It became, in the words of the American Declaration of Independence, "...their right, ...their duty, to throw off such Government, and to provide new guards for their future security." This is the sacred task which the Somali National Movement is spearheading. Our goals, simple but profound, are in brief: —

1. To remove Siad Barre's oppression, and autocratic rule;
2. establish a democratic and representative government on the basis of universal suffrage;
3. To bring about lasting peace with neighbouring countries, taking the interests and the right of all the peoples in the region into consideration;

(Continued on Page 11)

Ibraahim Maygaag wuxuu 1983 noqday wakiilka SNM ee Maraykanka iyo kanada. Waxaa markaa uu Ibraahin qoraalo ku soo qori jiray wargeys hanaqaadey oo ka soo bixi jiray dalka Maraykanka kuna baadisoocnaa “Somali Horizon”. Hase yeeshee 1987 ayya safaaradii Soomaalidu ku laheyd Washington diyaarinaysay xafladda dabaaldega sannadguuradii 27aad ee ka soo wareegtay dawladii habaarqabto.Tani waxay Ibraahim u aheyd guul uu adeegsan karo wargalin inuu siiyo madaxweynihii maraykanka ee xilligaa President Ronald Reagan. Waxaanu Ibraahin u qoray madaxweyne Reagan waraaq ka hadleysa hiyiga SNM iyo halgankii ummadu kaga soo horjeeday maamulkaa.Warqadaasi waxay ku soo baxdey wargeyskii Somali Horizon August/September 1987,cadadkii 8aad.

The Government of Siad Barre has indeed failed the Somali people. After 19 years of his rule the nation's fabric is torn apart. He divided in order to rule. He set clan against clan and set the fires of fratricidal wars ablaze so that he may float on top. The economy is in shambles. The resources of this poor nation are not mobilized for development, but to sustain the megalomania of Siad Barre thorugh corruption, patronage and nepotism. The few projects that remain, if any, as well as the normal import bill of the country entirely depend on foreign finance, since whatever remains from export proceeds cannot even meet the service on the huge debt. The foreign finance itself is not free from manipulation and corruption by the regime.



Al-Aalam/Issue No:227
18/06/1988

Sannad guuradii 8aad ee ka soo wareegtay aasaaskii SNM, ayaa Ibraahim Maygaag hubkii warbaahinta adeegsadey sidii lagu yaqaanay.Waxaa xilligan gacanta SNM ku jiray magaalooyinka Burco, Hargeysa,iyo degaanada ku xeeran.
Xilligaa wuxu Ibraahim Maygaag yimid magaalada London si uu uga qayb galo shir dib loogu qiimaynayey marxalada ey SNM mareysay.Waxaa shirkaa ka soo qayb galay xubno dhawr ah oo ka kala socday dalal kala duwan.Ibraahin Maygaag wuxuu hawshaa ku ladhay inuu warbaahinta siiyo warbixin.

Waxaanu Ibraahim Maygaag wareysi dheer siiyey jariiradii afka dheer ee Al-Aalam kana soo baxda cariga Ingiriiska magaalada London 04/06/1988,inkastooy jariidadu soo baxedey 18/06/1988.Wareysigana waxaa ka qaadey Nabiil Cabdulkariim.



ممثل الحركة الوطنية الصومالية د. سمتر لـ «العالم»:

الحكم الصومالي يتهاوى

نظرا لما يجري من احداث ساخنة في الجزء الشمالي من الصومال التقت «العالم» باحد قادة الحركة الوطنية الصومالية التي تقاتل نظام سياد بري في شمال البلاد ووجهت اليه عددا من الاسئلة.

الدكتور ابراهيم ميجاج سمتر هو عضو اللجنة المركزية للحركة الوطنية الصومالية وممثل الحركة في اميركا الشمالية، وقد عمل سابقا في عدد من الحقائب الوزارية والدبلوماسية في الصومال، منها المالية والصناعة والتخطيط ثم سفيرا لبلاده في المانيا الغربية، الى ان قرر الانضمام الى المعارضة. وهو الان لاجيء سياسي في الولايات المتحدة ويعتبر احد القادة البارزين في الحركة الوطنية الصومالية. وهو بجانب عمله كممثل للحركة في اميركا يسافر عدة اشهر تمتد احيانا الى ثمانية او ستة اشهر الى ميدان الكفاح ليعمل نصف وقته هناك مع المجاهدين في الجبهة الامامية.

عضو اللجنة المركزية للحركة الوطنية الصومالية: معظم مناطق الشمال في يد قواتنا

نطالب بنظام ديمقراطي يعطي الفرص للجميع

Dagaalkan warbaahintu waa tilmaamaha gaarka ah ee uu Ibraahim Maygaag kaga soocnaa inta la halmaaleysay ee halgankaa kala qayb gashey.Wuxuu ahaa Ibraahim Maygaag nin aftahanimadiisa iyo codkarnimadiisa u adeegsan kara afafka dhawrka ee uu hantiyey oo uu mid walba hodan ku ahaa.

## IBRAAHIN IYO HALGANKII UMMADA:




Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid ahaa dadkii aragti cad ka haystay maamulkii Afweyne. Todobaatanada dhexdeedii waxaa bilaabmay sal u dhigidii ururkii SNM.Ibraahim Maygaag

wuxuu ka mid ahaa dadka dawladii habaarqabto xil ka hayey, hawlaha ururkaana si habsami leh oo aan la dareemayn ugu hawlgalayey. Mujaahid Maxamed Kaahin oo arintaa ka waramaya ayaa lahaa: " Dad faro badan oo maamulka xil ka hayey ayaa hawshaa nala waday, Ibraahim Maygaag wuxuu ahaa dadka aan la dareemayn ee qarsan kara dareenkiisa hawshaana nala waday".

1979[kii] ayaa doorasho aan sal laheyn laga dhex sameeyey Xisbigii Hantiwadaaga Kacaanka Soomaaliyeed.Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid noqday dadkii hadalada halkaa ka jeediyey,waxaanu u arkay inay fursad fiican tahay kol haddii maamulkii dawladu ilaa Afweyne goobta joogo.Ibraahim Maygaag markii uu soo gabagabeeyey hadaladii uu halkaa ka jeedinayey ayuu ku soo afxidhay inuu iska casilayo xilka uu hayo,aadna ugu hanweyn yahay inuu Afweynena ka aqbalo arintaa.

Waxay aheyd arin ugub ah oo lagaga dhawaaqay Afweyne hortiisa,iyadoo waliba aheyd gole uu maamulkii dawladii habaarqabto ku dhan yahay.Dadkii meesha joogay waxay ku noqotay naxdin iyo afkala qaad.Waxaa loo baqay Ibraahim Maygaag oo qaarkood daremeen in haddiisii gashey barina maxkamadii wareegaysay ee cadaalada ka fogayd dil ku xukumi doonto.Ibraahim Maygaag sida loo qaadan karo iscasilaadiisa,waxa ka dhalan kara aad buu uga soo tashadey diyaarna ugu ahaa.Hadalkaa iscasilaada Ibraahim Maygaag si kalsooni leh ayuu u sheegay.Afweyne oo hadalkii qaatey ayaa gudoomay arintaa u soo jeediyey Ibraahim Maygaag.

Ibraahim Maygaag iscasilaadani waxay ka aheyd u banbixida hawlaha halganka,hase yeeshee Afweyne ayaa ku dagmay oo Ibraahim Maygaag u soo jeediyey inuu safiir ka noqdo safaaradii armalka Galbeed.1981 ayuu Ibraahim Maygaag mar labaad gudbiyey shaqo ka tagis,dalbadeyna magangalyo siyaasaseed.Wuxuu ahaa Ibraahim Maygaag qofkii ugu horeeyey ee dalka Maraykanku siiyo magangalyo siyaasadeed.Xilligani dawlada Maraykanku xidhiidh wanaagsan ayey la laheyd dawladii habaarqabto.Ibraahin Maygaag wuxuu yimid London,warbaahintana la wadaagey qoraalkiisii gilgilay gayigii Soomaaliyeed, dalal badan oo xidhiidh la lahaana ku kalifay inay dib uga fiirsadaan xidhiidhka ay la leeyihiin dawladii habaarqabto.

Muddo gaaban ka dib, Ibraahim Maygaag wuxuu noqday wakiilka SNM u fadhiya woqooyiga Amerika,waxaanu halkii ka sii wadey dagaalkii warbaahinta.Waxaa Ibraahim Maygaag aad uga qayb qaadan jiray mudaharaadada ay bulshada Soomaaliyeed iyo ururkii SNM ka fulin jireen ka soo horjeedka safaaradii Soomaalida ee cariga Maraykanka iyo xafiiska UN-ta.

1984 wuxuu Ibraahim Maygaag goostay inuu jiida hore ee dagaalka galo.Waxaanu Ibraahim Maygaag sii maray London ayna iska sii raaceen Axmed Maxamuud Siilaanyo oo markaa ka soo goostay maamulkii Afweyne.Waxaa magaalada Addi-Ababa ku qaabilay Rashiid Sh.Cabdilaahi oo ahaa agaasimaha idaacadii Halgan qaybta SNM, sidoo kale markana ahaa ku sii simaha gudoomiyaha xafiiska SNM ee Addis-Ababa. "Waxaan Ibraahim Maygaag iyo Axmed Maxamed Siilaanyo galinkii danbe tagnay hudheelka la yidhaa Ethiopia Hotel".

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Rashiid Sh.Cabdilaahi oo ka sii hadlayaa kulankaa yaa ku daray: "Waxaan la wadaagey warbixinta guud ee ururka anagoo meelaha qaarkood aad u falanqaynay sida dhismaha ciidamada,qaabkay u hawlgalaan iyo habdhaqanka siyaasiyiinta". Waxaa la go'aansadey in loo ruqaansado dhinacaa Jigjiga oo ay saddexdooduba isa sii raaceen.Waxaa markaa Jigjiga ka bilaabmayey shirkii Afraad ee ururka SNM,waxaana markaa xilkii ururka kaga dhaneyd mujaahid Cabdiqaadir Koosaar(IHUN).

Waxaa markan ay aheyd kulankii ugu horeeyey ee mujaahidiin badan la yeeshaan Ibraahin Maygaag. Waxaa mujaahidiintaa ka mid ahaa Xasan Ciise Jaamac,isagoo ka hadlayana wuxuu yidhi: "Bishii Ogoosto 1984 ayaa iskugu kaaya horaysay Ibraahim Maygaag oonu ku kulanay shirkii Jigiga".Waxaa xilligan loo doortay Ibraahim Maygaag inuu noqdo gudoomiyaha shirka si kalsooni leh,cod buuxana la wada siiyey. waxaana ku xigeen loo doortay Cali Hagarley oo beesha Hawiye ka soo jeeday,halka Rashiid Sh. Cabdilaahi – Rashiid Gadhweyne- loo doortay ku xigeenka labaad.

Xilligan waxaa dhamaadey xilkii ugu horeeyey ee gacanta u gala saraakiisha SNM. Waxaana loo balansanaa in doorasho dhacdo.Doorashada Ibraahim Maygaag loo doortay gudoomiyenimada shirkaa waxaa loo arkayey inay dawo ka noqon doonto isafgaranwaa aad u hadheeyey saraakiisha iyo siyaasiyiinta.Xubnihii dibada ayaa aad ula dhacey maamulkan ay saraakiisha ciidamadu gacanta ku dhigeen uuna halkaa ka bilaabmay xidhiidh la tilmaami karo.Iyadoo dadka qaarkii ay si geesinimo leh u sheegaan in ay aheyd markii ugu horeysay ee xidhiidhka dalalka dibada iyo xubnaha dibada ee SNM ay heleen hogaan ay la xidhiidhi karaan.Damal Cabdiqaadir Koosaar (IHUN) iyo saraakiishii la hawlgashey ayaa mudan in loogu hanbalyeeyo xil gudashadaa wacneyd.Maamuladii ka horeeyey iyaga laftigoodu amaan way lahaayeen.

1989 waxaa yimid xeryihii SNM ururkii dhalinyarada ee UFO.Waxaa kaloo jiray saraakiil badan oo markaa timid.Halgankii dagaalka ee jiida hore hakad baa ku yimid waxaana loo baahnaa dardar cusub.Ibraahin Maygaag, iyo saraakiil ay ka mid ahaayeen Jeneral Cali Xuseen, Kornayl Haybe Cumar iwm ayaa ka wada hadlay aasaasida koox ciidan oo saraakiishan gacanta u gala,kooxda UFO-na hormood u noqoto. Ibraahim Maygaag wuxuu markaa iskii isku xilqaadeu inuu dhalinyaradii UFO kaxeeyo , soona mariyo in badan oo xeryihii dagaalka ee ku xeeranaa magaalada hargeysa.Axmed (Jabane) oo ka mid ahaa dhalinyaradii UFO oo arintaa ka hadlayana wuxuu yidhi: "Waxaanu Ibraahin Maygaag Samater xil ahaan dusha iskaga saarey una fuliyey inuu annagoo isku duuban na geeyo dhamaan xeryihii ku xeernaa magaalada Hargeysa xagga bariga iyo galbeedkaba, ugu danbeyna nala joogay muddo kooban Godka Green oo aheyd saldhigii aanu ka dagaal galaynay".

Ibraahim Maygaag wuxuu aad u aaminsanaa inuu guushu la jirto ururka SNM ee xaq u dirirka ah. Waxaa dagaal fool-ka-fool ah laysku haleelay Maqaaxida inanta,waxaanay ciidamadii SNM-ta ku yara adkaatey inaanay dhinaca Hargeysa uga gudbi karin,dabadeed Ibraahin Maygaag khudbad la yaab leh ayuu halkaa ka jeediyey.Axmed Maxamed Jabane oo ciidamadaa ka mid ahaa ayaa noo soo gudbiyey weedhihii Ibraahm Halkaa ka jeediyey.Wuxuu Ibraahim Maygaag maalinaa yidhi: "Meeshan innaga uun baa leh,kuna danbeyn doona Afweyne iyo ciidamadiisu way ka tagi doonaan kumana nagaan

karaan".Ilaahay wuu ka dhabeeyey weedhahaa uu sida kalsoonida leh u yidhi Ibraahim Maygaag.

Ibraahim Maygaag markaa wuxuu u sii dhaafey jiida galbeed. Ibraahim Maygaag iyo wafdigii uu hogaaminayey markay gaadheen Lughaya ayuu halkaa ugu jeediyey khudbad la yaableh maxaabiis laga qabtey cadawgii.Ibraahim Maygaag iyo wafdigiisii kormeerkii ayey sii wadeen ilaa ay tageen Lowyacadde. Ciidamadii Afweyne ayaa ogaadey inuu wafdiga kormeerkan Ibraahim Maygaag iyo xubno sarsare oo hogaankii SNM ah ka mid ahaayeen. Waa laysku habarwacdey si gacanta loogu dhigo waftigaa.Hase yeeshee dawlada Jabuuti ayaa gacan weyn ka geysatey in waftigaasi nabadgalyo ugu soo noqdo xeryihii ciidamada.

Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale (Boobe) oo ka mid ahaa waftigaa ayaa ka waramey xaaladii xilligaa,yidhina: "Carraabe ayaanu ku gallay Lowyacaddo. Saraakiishii Jabuuti ayaa maalintii danbe maqashay joogitaankayaga Lowyacaddo. Qayilaad ayay nagu marti-qaadeen oo xeradii Jaan-daaranka ayaa nala geeyay. Ilaa saqdii dhexe ayaanu wada joognay iyaga oo ka yaabban awoodda SNM-ta iyo sida ay dalka uga taliso. Lowcaddo dhinacii Soomaalida ayaanu ku soo noqonnay habeen badhkii. War dhiillo leh ayaa naloo sheegay oo ahaa in ciidammadii Siyaad Barre dib u qabsadeen Ceel-gaal kuna soo jeedaan Lowyacaddo. Ciidan aan badnayn oo nala socday xaggaa iyo Seylac ayay cidhib barako leh ugu dhufteen si ay u haybsadaan ciidammadoodii xaggaa iyo Lughaya ku sugnaa si ay weeerar rogaal-celin ah u qaadaan. Saraakiishii Jabuuti ayaa galabnimadii noo timid, waxaanay intayadii mas'uuliinta ahayd noo kaxeeyeen xagga Jabuuti oo aanu laba habeen u hoyannay ka dibna, waxaanu u tallownay Itoobiya annaga oo laba maalmood ku sugnayn Dawanle".

1990 ayuu Ibraahim Maygaag isku soo sharaxey gudoomiyenimada ururkii SNM,hase yeeshee kumuu guulaysan.Markii uu ku guulaystay mujaahid Cabdiraxmaan Axmed Cali (IHUN) ayuu Ibraahim Maygaag jeediyey khudbadii hanbalyeynta,muujiyeyna in ay haboon tahay in isku haneeyo,balana qaadey wadasheyn uu ka dhabeeyey.

1993 Waxaa lagu jiray shirkii Boorama ee talo kala wareegii ururka SNM. Waxaa muran xoogan iyo dagaal dhex maray xubnihii SNM oo isku tudhi waayey,ilaaweyna waxay u soo dagaalameen. Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid ahaa ragii tirada yaraa ee ay arintani aad u dhibaysay,xal u raadinteedana ku mashquulsanaa. Nin waayeel ahaa oo dalka markaasi ugu horeysay ayaa Ibraahim Maygaag hadal la gaadhey ,kuna yidhi: "SNM fursad bay iska lumiyeen, magac iyo milgana meesha way ku waayeen isqabqabsigooda dartii". Ibraahim Maygaag oo aad loogu yaqaaney aftahimada iyo hadal u meeldayga ayaa si qunyar ah ugu caqli celiyey wadaadkaa yidhina: "SNM waxay u dagaalameysay adigoo aan halganka ka qayb qaadan inaad sidaa xoriyada ah u hadli karto,guul baaney SNM tirsaneysaa markay xoriyadaa kuu soo celisay". Ninkii waayeelka ahaa waxaa ku dhacey afkala qaad.

Ibraahim Maygaag ilaa maalintuu dhiman doono wuxuu heegan u ahaa dayactirka iyo daryeelida danaha ummada Somaliland.Waxaan marna maanka qof kasta oo u dhashey wadanka Soomaliland ilaaweyn dardaarankii uu Ibraahim Maygaag uga tagey: "

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

# ANIGIYO XASUUSTAY :

Maqalka dhagahaygu waxay aad uga dharagsanaayeen aqoonyahan Ibraahim Maygaag. Waxaa had iyo jeer goobaha aqoonta aad loogu hadal hayn jiray heerka aqooneed ee Ibraahim Maygaag iyo sida ugu hawlgalo.Waxaa runtii tiro beelay dad badan oo wax bartay aanayse u wehelin barbaarinta aqooneed ee ka midho dhalisa aqoonta uu qofku yeesho.Tusaale ahaan waxaa badan dhakhtar aqoon fiican u leh dhibta uu sigaarku leeyahay had iyo jeerna uga digo bukaanka uu daweynayo inay cabaan sigaarka.Hase yeeshee habdhaqanka dhakhtarkan ayaa aad looga dareemaa inuu ka mid yahay kooxaha ku baas nuugista sigaarka.

Ibraahim Maygaag waxaa lagu tirin karaa hormoodka aqoonta maadiga iyo diinta meel xeeldheer ka gaadhey,habdhaqankiisuna aanu ka hor-imanayn wanaaga ay wadato aqoonta uu guntiga ku xidhay.Sidaa darteed ayaa Ibraahim Maygaag loo soo qaataa tusaale lagu dayan karo marka laga waramayo in aqoon heersare laga gaadho, habdhaqankeedana la yeesho.

Xilli ku beegnayd bishii Sebtember 2009 ayaan ogaadey inuu Ibraahim Maygaag booqasho fasax gaaban ah ku yimid magaalada Ottowa ee cariga Kanada oo reerkiisu degan yahay.Tani waxay ii noqotay fursad wanaagsan oon aan xidhiidh telefoon kula yeelan karo.Waxaanan cuskadey gacantii telefoonka,garaaceyna summadii telefoonka guriga Ibraahim Maygaag oo aan ku guulaystay helitaankiisa.Waxaa iga qabatey xaaskiisa Aamina oo salaanta ka dib si fiican u garatey walaalkay Maxamed Sh. (IHUN),ka dibna ii gudbisay Ibraahim.

Salaan iyo iswareysi gaaban ka dib, ayaan uga sheekeeyey qoraalada aanu wadno iyo sidaanu hiil ugu baahan nahay. Ibraahim oo aad dareemayso farxada ka muuqata ayaa si aan hakad laheyn u amaaney hawsha qalin ku dirirka ee loo igmadey qorida taariikhdii bulshada Soomaliland iyo halgankii ururka SNM.Ibraahim maalintaa wuxuu balan qaadey inuu si hakar la'aaneed uga qayb qaadanayo,waxaanu iigu deeqay sumadiisa telefoon ee wadanka Japan oo uu laba todobaad ka dib u anbabixi doono.

Laga bilaabo maalintaa wadahadal aanu wadahadalno noogu horaysay, Ibraahim Maygaag wuxuu ka mid noqday halbowlayaasha tiirka u ah qoraalada xeeldheer ee ka soo burqada mareegta Farshaxan.Ibraahim Maygaag wuxuu ahaa qof ku siinaya kalsooni buuxda si aad u dhiiban karto aragtidaada haddaa markay ka duwan tahay aragtidiisa. Aqoontiisa xeeldheer, iyo waayo aragnimadiisa noloshu ma boqno goyanayaan dhiibashada iyo ka hadalka aragtidaada ee way kaabayaan.

Qoraalada ku soo baxey mareegta Farshaxan ee Ibraahim Maygaag si hakar la'aaneed uga qayb qaatey waxaa ka mid ahaa ilaa dhawr toban qoraal oo ka warameyey maalintii dhagaxtuurka Febraayo 20$^{dii}$ ee 1982, Qoraalkii Halyeygii Mujaahid Lixle, Qoraalkii Halyeygii Mujaahid Aadan Shiine, Qoraalkii Halyeygii Xasan Yoonis Habane,Qoraalkii Halyeygii Cali Xuseen,iwm.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Waxaase xus gaar ahaaneeed mudan in Ibraahim Maygaag uu ka qayb qaatey qoraalada mareegta Farshaxan.Wuxuu Ibraahin Maygaag qoray qoraal kooban oo uu kaga waramayo taariikhdii SNM(Short History of SNM) , deeq sharafeedna ugu fidiyey qolka kaydka ee mareegta Farshaxan.Tani waxay aheyd dhiirigalin iyo hiilin kale oo Ibraahim Maygaag u muujiyey bahda mareegta Farshaxan.Mareegta Farshaxan si gaar ahaaneed waxay wayday halbowle qalinka ciidamin jiray,qorigana aan hakin eek u ladha marka loo baahdo. Bulshada Reer Somaliland waxaa ka baxey halyey hogaan lagu diirsado u noqon lahaa.

# GEERIDII IBRAAHIM MAYGAAG:

**Warka sida jantaha iyo madfaca jibinta aan moodnay,**

**Ee maanta dalkaba jiidhay ee jeex kastaba gaadhay,**

**Jariidaadku goortay qoreen amase joornaalku,**

**Judhii ay maqleen bay dadkii wada jareeyeene,**

**Nin waliba halkii uu ku jiray jaw ka soo yidhiye,**

**Jariiradda iyo oohintiyo jiibta iyo taaha,**

**Iyo qaar iyaga oo aan jug qabin juuqba laga waayay,**

**Badhna jiifka aamine wadnaha jararacdiisiiye,**

**Mooraalka jiifsaday iyaga oo cagaha jiidaya,**

**Jawigoo beddelan bay dadkii jidadka buuxsheene,**

**Allahayow jannee oo ka yeel Nebiga jaarkiisa,**
(Abwaan Axmed Maxamed Nuur-dhako)

Dabayaaqadii 2010 ayaa Ibraahim Maygaag uu dad dhawr ah la wadaagay inuu hawlgab ka galayo hawshii macalinimada ee uu ka hayey dalkaa Jabaan.Tani waxay yididiilo badan galisay aqoonyahan badan iyo dhalinyaro u arkayey Ibraahim Maygaag inuu yahay



Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

haldoorka ummada Somaliland.Wareysi uu siiyey Warbaahiyaha afka Soomaaliga ee Beenta iyo Baahinta Colaada(BBC) ayaa wuxuu Ibraahim Maygaag ku boqno gooyey aragti ay la meeraysanayeen dhawr qofna dhex dhigeen oo uu ka mid ahaa …………..

Hase yeeshe Ibraahim Maygaag oo had iyo jeer nolosha ka haysta aragti cad ayaa si aan gabasho laheyn u sugay in burburkii dawladii Soomaaliya ay Somaliland ka faa'iiday guul weyna gaadhey oo la taaban karo.Dhagaha bulshadii u heelanayd Ibraahim Maygaag ayey tanina sii xoojisay,iyadoo la ogaadeyna inuu dalkii hooyo ee Somaliland ku soo jeedo. Waxaa hadalhayntu ku badnayn in madaxweynihii mustaqbalka ee Somaliland muddo dhaw soo cagodhiganayo.Illaahay baase sidii kheyr ku jiro ogee ma qadarin in himiladaa ummadu dhaboowdo oo bishii Janaayo 31 2011 , maalin Axad ah ayuu Ibraahim Maygaag ku geeriyooday gurigiisa ku yaala dalka Jabaan.



Bishii Febraayo 13,2011 ayya Marxuum Ibraahim Maygaag oo maalin Axad ah ay saacaduna ahayd 8:45 subaxnimo maydkiisa laga soo dejiyey madaarka Cigaal International Airport, halkaas oo ay keentay diyaarad laga soo saaray magaalada Japan, waxa lagu aasay xabaalaha Qaranka ee caasimadda Hargeysa.

Aaska Marxuumka oo dadweyne aad u tiro badani ka qaybgaleen.Waxaa kaloo ka soo qaybgalay Madaxweynaha iyo M/wayne ku Xigeenka Somaliland, shirguddoonada labada gole Baarlamaan, wasiiro, madaxda saddexda xisbi qaran, Aqoonyahano iyo boqolaal dadweyne ah.

Ibraahim Maygaag wuxuu ifka kaga tagey saddex caruur ah (Raage, Shukri iyo Luula) iyo xaaskiisa Aamina Jaamac Xasan

## BAROORDIIQDII IBRAAHIN MAYGAAG:

Mujaahid Ibraahim Maygaag geeridiisii waxay ummadaha aduunka ee daneeya aqoonta ku noqotay filanwaa iyo naxdin murugo badan keensatey.Waxaase la wada ogsoon yahay in geeridu xaq tahay.Bulshadii wadanka Japan ee aqoontiisa ugu deeqay waxay markiiba soo jeediyeen inay ogaysiis ay bulshada ku wargaliyaan geerida iyo baroordiiq loo sameyn doono maalinta khamiista ee bisha Febraayo tahay 3, 2011.Waxaanay mareegta Jaamicada Josai International University ku xardheen maalintii Arbacadii ee Febraayo 2,2011 ogaysiiskan:

"It is with great sadness that I tell you that Professor Ibrahim Samater passed away the day that his wife arrived in Japan to spend two months with him. His family has decided to take him to his country where he wished to live after retirement. We are going to have a special ceremony for him in Togane tomorrow afternoon."

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Sidoo kale ayaa wadamo badan oo aduunka dacaladiisa ku yaala ay jaaliyadaha reer Soomaliland ku qabteen baroordiiq ay ku ladhan yihiin xuska taariikh nololeedkii Ibraahim Maygaag, iyo ducayn loo ducaynayo

## LONDON,UK:



Xilli ku beegnayd bishii Febraayo 13dii ,2011 aheydna maalin Axad ayaa bulshoweynta Ingiriiska iskugu soo baxeen goob ku taala woqooyiga London ahna Selby Centre, Selby Road, London N17 8JL. Waxaa hormood ka ahaa qabanqaabada baroordiiqdan Maxamed Cumar Maygaag iyo Khadar Cali Gaas.

Waxaa goobtaa ka jeediyey khudbado kala duwan ooy kaga waramayeen sooyaalkii taariikheed ee Mujaahid Dr.Ibraahim Maygaag iyo dhacdooyinkii la yaabka lahaa ee lagu xasuusanyo maanta aqoonyahano dhawr ah..

Waxaa halkaa ka hadlay Mujaahid xmed Xasan oo ahaa safiirkii hore ee Somaliland u fadhiyey Ingiriiska,ahaana badhasaabkii ugu horeeyey ee Hargeysa markii xornimada Ingiriiska laga qaatey 1960.Waxaa kale oo halkaa ka hadley Mujaahid Rashiid Sh.Cabdilaahi "Rashiid Gadhweyne" oo ah aqoonyahan ururiya taariikhda ummada Somaliland.Rashiid Sh.Cabdilaahi wuxuu ku meelgaadh ahaan u hayey xafiiskii Adis-Ababa ee SNM kuna qaabilay Ibaahin Maygaag iyo Siilaanyo oo wada socda kana yimid Ingiriiska.

Waxaa isna halkaa ka hadlay Mujaahid Axmed Mire oo qayb laxaad leh ka soo qaatey halgankii ummada,ayna Ibraahim Maygaag in badan qoraalo badan wadaageen.Sidoo kale dhinaca dawlada Somaliland waxaa halkaa uga hadley wasiirka arimaha dibada ee Dr.Maxamed Cabdilaahi.Waxaa halkaa ka sheegay inuu isagu qayb laxaad leh ka qaatey qaybintii warqadii Ibraahim Maygaag ee iscasilaadiisii 1981 wariyaha caanka ah ee Maxamuud Cabdi Ducaale.Dadka halkaa ka hadlay oo fara badnaa waxaa ka mid ahaa Wariye Dalmar,Mujaahid Aadan cade,Suldaan Aadan suldaan cabdiraxmaan,iwm.Waxaa ugu danbeyntii magaca ilma Maygaag ku hadlay Maxaed Cumar Maygaag iyo Rashiid Cali Maygaag.

## TORONTO,CANADA:



Xilli ku beegnayd bishii Febraayo 19dii ,2011 aheydna maalin Sabti ah ayaa bulshoweynta wadanka Kanada siiba magaalada Toronto iyo agagaarkeeda ay ku

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

kulmeen kulan baroordiiq ah oo xus iyo duco isugu jiray.

Waxaa halkaa ka hadlay kana sheekeeyey sooyaalkii Mujaahid Ibraahim Maygaag dad dhawr ah oo ay ka mid ahaayeen Seynab Yusuf X. Adan. Cali Serraar, Maxamed Ismaaciil Beergeel, Cabdi Xuseen Ciise, Mujaahid Axmed Yussuf, (Axmed Jabane).

Waxaa ugu danbeyntii magaca reer Maygaag ku hadlay Cali Xasan Maygaag.

## OTTOWA,CANADA:



Xilli ku beegnayd bishii Febraayo 13dii ,2011 aheydna maalin Axada ah ayaa bulshoweynta wadanka Kanada siiba magaalada Ottowa iyo agagaarkeeda ay ku kulmeen kulan baroordiiq ah oo xus iyo duco isugu jiray.

Waxaa halkaa ka hadlay kana sheekeeyey sooyaalkii Mujaahid Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani,Ibraahim Meecaad, Cabdiraxmaan Xasan Cawl .

## UPPSALA ,SWEDEN:



Febraayo 26, 2011 ayaa dadka reer Somaliland ee degan wadanka Sweden iyo agagaarkoodu iskugu yimaadeen magaalada Uppsala.Dalada midaysa jaaliyadaha Sweden ayaa soo qabanqaabbisay kulankaa baroordiiqda ah.Waxaana xafladaa lagu qabtay Xafiiska Golaha dalada guud ee Jaaliyadaha Sweden .Waxaana kulankaa gadhwadeen ka ahaa Zakariye Xasan Waceys oo ah gudoomiyaha daladaa. Gudoomiye Zakariye wuxuu hadalka u qaybiyey xubno aqoon fiican ay isku lahaayeen Ibraahim Maygaag,halka qaarkood ay halgankii SNM ee jiidaha hore ka wada qayb qaateen.Dadkii ka hadlay halkaa waxaa ka mid ahaa Caydruus Sh. Aadan, Rashiid Sh. Aadan, Axmed Cawaale, Jaamac Sweden, Cabadilahi Faarah, Axmed Cabdi Dacar .Waxaa kaloo xusid mudan in telefishanka Somaliland ee Sweden ee uu qayb laxaad leh ka qaatey gudbinta kulankaa.

## HARGEYSA,SOMALILAND:

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan




Habeenkii ay bishu Febraayo aheyd 16,2011 ayaa kulan baroordiiq ah loo qabtey Prof: Ibraahim Maygaag Samatar. Kulankaasi wuxuu ka dhacey hotel Maansoor ee magaalada Hargeysa.Kulankan waxaa soo qabanqaabiyey gudi ay xukuumada Axmed Maxamed Siilaanyo u xilsaartey aaska iyo kulanka baroordiiqda ahba.Waxaa halkaa hadalo ka jeediyey Sheekh Aadan Siiro, ambassador Maxamed Sh. Xasan Nuur, Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale(Boobe), Maxamed Kaahin

Hadaladii halkaa laga waxaa ka mid ahaa qaar talojeedin ah sida Sheekh Aadan Siiro oo soo jeediyey,yidhina: "Xukuumada waxaan usoo jeedin lahaa Jaamacada Hargeysa ha loogu magac daro, taasina waxay noqonaysa in laba arrimood yoolkiisa ku dilno, mid ixtiraam waxay u tahay bulshadii Hargeysa, midna waxay u tahay halgankii ummadda, mid waxay tusaale u ahay aqoonta oo ah inay hagto jamhuuriyadan curdinka ah ee Somaliland".

Waxaa kaloo hadaladaa ka mid ahaa kuwo ku saabsan sooyaalkii Ibraahim maygaag Samater. Waxaana dadka arintaa ka waramey ka mid ahaa Maxamed Kaahin oo yidhi: " waxa xaqiiqo ah Ibraahim Maygaag Samatar inuu ka mid ahaa ragii bud dhiga u ahaa aasaaskii halkankii ururkii SNM ku samaysmay, Ibraahim Maygaag Samar isagoo wasiir ah oo Xamar jooga ayaa waxa uu ka mid ahaar aga faro ku tiriska ah ragii qabanqaabiyey ee gudaha ka qabanqaabiyey sidii ay iskugu xidhmi lahaayeen halgankii dibada ka socday iyo kii gudaha ka socdayba, waliba wuxuu ahaa ragna caadifada ayey qarsan kari waayi jireen oo marna way dagaalami jireen, Ibraahim wuxuu ahaa raga mar walba ku jiray hawsha, hadana aan qofna waxba ka dareemi jirin".

Gudida loo xilsaarey aaska iyo kulankanba oo si fiican u gutay xilkooda waxay kala ahaayeen maayarka caasimada Hargeysa Injineer Xuseen Maxamuud Jiciir , Wasiirka

Fu’aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Wasaarada iyo Booshaga iyo isgaadhsiina Somaliland Dr. Axmed Xaashi Oday,Axmed Maxamed Dirir,Xildhibaan Axmed Maxamed Diiriye (nacnac),Gudoomiyaha gobolka Axmed  Cumar Cabdilaahi( Xamarji), Agaasimaha guud  Cabdilaahi Blacki, iyo Afhayeenka Xisbiga KULMIYE Maxamed Kaahin.

## TILMAAMIHII IBRAAHIM MAYGAAG:

Ibraahim Maygaag waxaa lagu tilmaamaa inuu aad u afgaabnaa,markuu hadlana u meel dayi jiray.Wuxuu ahaa nin aan ku dhiiran raadina ka aargoosiga shakhsiyeed iyo aflagaadeynta  dadka.Wuxuuse ahaa ni hal adag oo gartiisa si cad u sheegta,gabashaduna ka  madhan tahay.Rasuulka(SCW) ayaa yidhi xadiis macnihiisu ku dhawaanayo” waxaa la ii soo diray si aan u dhameystiro  habdhaqanka(akhlaaqda) inta ugu mudan.” Ibraahim Maygaag waxaa tilmaan u aheyd inta ugu mudan ee bani’aadam yeesho.

Waxaa si kooban oo farshaxanimo ku dheehan tahay  u tilmaamay Ibraahim Maygaag …… Wuxuu yidhi “Afsoomaligu wuxuu leeyahay erayga “dhamme” ,Ib raahim wuxuu ahaa dhame”.Eraygaasi waxaa loo adeegsadaa  qof Ilaahay u dhameeyey tilmaamaha wanaagsan,sidaasuu Ibraahim mutay in si kooban loogu deeqi karo  eraygaa “Dhamme”. Markaad dib u milixsato habdhaqankii nololeed ee Ibraahim maygaag waxaa maankaaga ku soo dhaceysa weedho qiimo leh oo uu Sheekh Cabdi Xamiid Kishka (IHUN) aad ugu celcelin jiray,waano dhaxalgal ahna ahaa:

عش راضياً وأترك دواعي الألم    وأعدل مع الظالم مهما ظلم
نهاية الدنيا فناء    فعش فيها كريماً و أعتبرها لغد

Illaahay waxaan uga baryeynaa inuu  Naxariistiisa darteed Jannatu Fardawsa ku galiyo. Ilaahay qoyskii IbraahimMaygaag , iyo dhamaanteena samir iyo iimaan  ha innaga siiyo.Illahay ha ina garansiiyo dhaxalkuu Ibraahim Maygaag inooga tagey….

Qalinkii iyo Tafatirkii:
Fu’aad Sh.Abuubaker
Bahda Mareegta Farshaxan
www.farshaxan.com

Tixraac:

-Qolka Kaydka Mareegta Farshaxan

-Xidhiidho telefoon oo Mareegta Farshaxan la sameysay Ibraahim Maygaag Samater.

-Xidhiidho “emailo” Mareegta Farshaxan la sameysay Ibraahim Maygaag Samater.

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

-Warbixino qoraal iyo codba isugu jira ooy soo bandhigeen mareegaha
Hadhwanaagnews, Oodweynenews,Farshaxan, Gabileynet,Togaherer,Qarannews,iwm

-Wareysiyo ay la yeelatay Mareegta Hadhwanaagnews Ibraahim Maygaag(IHUN)

-Mareegta http://gacmadheere.com

- Letter of Resignation to President Barre
Dr.Ibrahim Maygaag
Wargeyska Horn Of Afrika
(1981/1982 –Volume 4, No.2)

-Wareysi Dr.Ibrahim Maygaag lala yeeshay
oo ahaa Wakiilka SNM ee woqooyiga Ameerika
Wargeyska Al-Aalam
(18/06/1988 , Issue No.227)

-Letter to President Ronald Reagan.
Ibraahim Maygaag Samater
Wargeyska Somali Horizon
( August/September 1987 , Volume 8 )

-Light At the End of the tunnel
Ibrahim Maygaag Samater
Mareegta Somali Study

-Where I Stand
Ibrahim Maygaag Samater
Kaydka Mareegta Farshaxan

- Short History of SNM
Ibraahim Maygaag
Kaydka Mareegta Farshaxan

-Wareysiyo ay mareegta Farshaxan la yeelatay :
i) Mujaahid Maxamed Cabdilaahi Ismaaciil (Maxamed Beergeel)
ii) Mujaahid Maxamed Cilmi Galaan
iii) Mujaahid Rashiid Sh.Cabdilaahi (Rashiid Gadhweyne)
iv) Mujaahid Cabdiraxmaan Axmed Cawl (Baqdaadi)
v) Mujaahid Cabdiraxmaan Yuusuf Ducaale (Boobe)
vi) Mujaahid Axmed Maxamed Jabane
vii) Mujaahid Dr. Maxamuud Sh. Xasan Taani
viii)Mujaahid Cabdiraxmaan Faarax Barwaaqo
ix) Mujaahidad Aamina Candhoole (Xaaska Ibraahim Maygaag)
x) Mujaahid Axmed Cabdi Dacar
xi) Mujaahid Maxamuud Cabdi Dacar

Fu'aad Sh.
Bahda Mareegta Farshaxan

Copyright ©2003-2011 Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.